

# COLAAD

Qiso

Majid Xuseen Abubakar

dooritech
ICT SOLUTION CENTER

SARIIX

**Copyright © 2025 Majid Hussein Abubakar Xuquuqda Buuggan waxay u dhowrsan tahay qoraaga: Majid Hussein Abubakar.**

Xuquuqda Buuggani waa mid dhawrsan. Buuggan ama qeyb ka mid ah lama daabacan karo, sina looguma xadgudbi karo, iyadoon oggaalanshiyo qoran laga helin qoraaga buugga.

## ARAAR

Colaaddu waa cudur dilaa ah oo galaafta nafaha, burburiya qoysaska, aafeeya bulshooyinka, curyaamiya oo wiiqiya horumarka, una horseeda dadka dhibbaato aan dhammaad lahayn. Waa duufaan mar kasta oo ay kacdo guba rajo kasta oo nabaddeed, jahawareerna ku ridda jiilasha soo socda. Waxay ka mid tahay musiibooyinka ugu halista badan ee caqabad ku ah jiritaanka nolol nabaddeed, iyadoo raad xun ku reebta qalbiyada iyo xusuusta ummadda.

Qisadan, "Colaad," waa bandhig qiiro leh oo muujinaya sida aafada colaaddu u gashay bulshadeenna, ugana dhigtay jiilal badan kuwo aan haysan fursad ay kaga baxaan raadkeedan xun. Waa qiso ka tarjumaysa xaqiiqooyinka ka dhex alloolsan bulshada qeyba ka mid ah, balse aan lagu bar tilmaamaysaneyn cid gaar ah.

Sheekadu waxay dareensiinaysaa akhristaha xanuunka iyo cadaabta ay keento colaaddu, waxayna sidoo kale ka sheekaynaysaa ifafaalo yididiilo leh oo horseedi kara

nabad waarta. Ujeeddada laga leeyahay sheekadan waa in ay bulshadeennu ka fiirsato dhibaatada colaaddaha iyo sida ay muhiim u tahay in jiilalka mustaqbalka laga badbaadiyo silaca ay keento. Waa fariin ay ku ladhan tahay dhiirrigelin, wacyigelin iyo xasuusin ay tahay in aan marnaba la iloobin.

## MAHADNAQ

Qisadan "Colaad" ma noqon lahayn mid suuragasha haddii aysan jirin dad iyo shirkaddo garab istaagay dadaalka lagu curiyay. Sidaas daraadeed, waxaan si qoto dheer ugu mahadcelinayaa **Dooritech ICT Solution** iyo **Sariix Advertising Agency** oo gacan weyn ka geystay in qisdan ay soo if-baxdo.

Sidoo kale, mahadnaq gaar ah waxaan u dirayaa **Zakariye Cartan Cali**, oo ahaa soo saarihi suurageliyey in qisadan ay soo if baxdo, lana gaarsiiyo dadweynaha. Daddaalkiisa iyo dhiirrigelintiisa wax weyn ayay ka tari doontaa in qisooyinka wacyigelinta ah ee la curiyo ay gaaraan heer ay wax ka beddelaan nolosha bulshadeenna.

## AFEEF

"Colaad" waa qiso la curiyay, mana matalayso qof, qabiil, ama deegaan gaar ah. Waa qiso la xardhay oo muujinaysa xaqiiqooyin ka dhex jira bulshada, lagana dhaxli karo casharro qoto dheer oo ku saabsan dhibbaatooyinka colaadda. Ujeedada qisadan ma ahan in cid gaar ah wax loogu tilmaamo ama lagu xoojiyo dareen colaaddeed, balse waa fariin wacyigelin ah oo xambaarsan baaq nabaddeed.

Qof kasta oo akhriya qisadan, waxaan rajaynayaa in uu ka dheeefayo dareen, toosin iyo fahan qoto dheer oo ku saabsan dhibbaatada ay colaaddu leedahay. Waa in aynu u midoowno dabbar-goynta colaaddaha, si aan jiilasha soo socda ugu dhaxalno bulsho xasilloon oo ay ka jirto is-qaddarin iyo wadda noolaansho nabaddeed. Waxaan rajeynayaa in qisadan ay wax ku kordhin doonto dareenka nabadda iyo is-afgaradka bulshada dhexdeeda.

## COLAAD | QEYBTA 1AAD

Barqo hore, cadceeddu markay cirka olollisay oo ay ku beegneyd subax Sabti ah, ceelka weyn ee Reer GAAFANE ayaa lagu arkay laba qof oo meydadkooda la dul dhiggay ceelka dushiisa kadib markii lagu hubsaday inaysan naf kusii dambeyn, iyada oo meydadka dhiiggooduna uu kusii qulqullaayo gudaha ceelka oo aan markii horeba dabbool adag lahayn. Muuqa iyo midabkii biyaha ceelka ayaa isku beddelay midabka casaanka oo rasiin ah, oo aad mooddo in si ula kac ah loogu tallagay in ceelkaasi aan mar dambe loo soo dhaan-raadsan. Wallow uu ahaa ceelka keliya ee ay ku tiirsanaayeen reer GAAFANE.

Cabsi iyo argagax oo ay wehliso amakaag ayay ku noqotay dadkii kusoo kallahay inay ceelka usoo dhaan doontaan. Arrimahan oo kale kuma cusba deeggaanka oo waxaa marar badan lagu waabariisan jiray fallal gurracan oo aan la mahdin jirin oo ay iskula kici jireen dhinacyada reer GAAFANE iyo reer MAAX oo hal deeggaan wadda yaal kuna sifeysana laba reer oo colaadi dhex taal sannado tirsigoodu baddan yahay.

Labada marxuum ee meydadkoodkii cabsida ku abuurray dadkii deeggaanka, waxay ka dhasheen oo ay kasoo jeeddeen reer GAAFANE. Mid ka mid ah si fiican looma aqoosan karin muuqaalka wejigiisa oo waxaa ku yaallay dhaawacyo aan loo meel dayin una muuqday in lagu suurrad dillayo marxuumkaasi, iyada oo si arxan darro leh loo birreeyey, inkastoo dadkii deeggaanka ay waddeen daddaallo ku aaddan inay aqoonsadan marxuumkan cidda uu ahaa. Arrinta mucjisada waddata oo intii goob joogga hore iyo kuwii qeylo-dhaanta dambe ku yimidba ku abuurtay welwelka iyo walbahaarka farraha badan ayaa waxay noqotay, in mid ka mid ah labada marxuum ee la aqoonsaday wejigiisu uu noqday ilmo yar oo lagu qiyaaso da'da Lix sanno jir. Waana arrinta sababtay in dhaanki looso kallahay uu isku beddelo madal tacsi taal oo baroortu is qabsatay.

Reer GAAFANE iyo Reer MAAX waxay ahaayeen qoysas muddo dheer colaad ba’an oo aan sabab cad lahayn dhex maraysay. Dagaalka wuxuu ka bilowday ismaandhaafyo yar-yar oo lagu xallin karaayey wadda hadalo iyo garnaqsi

lagu wadda qanacsan yahay oo loo geed farriisan karo, intii aysan tallo farraha ka bixin laakiin waxaa la dhaxlay colaad ba'an oo labada reer ee dhinacna walaallaha ka ah, dhan kalena wadda dagga ay marba si naftu aysan aqballi karin isku laaya, inkastoo intooda wax-magaratada ahi ay ku diirsadaan daaddashada dhiigga walaalahooda.

Dadka deegaanka, halkii ay ka fikiri lahaayeen horumar, iskaashi iyo wadda noollaansho sida uu qabo xeerkuba, taas beddelkeed waxay ku howlan yihiin sidii ay u kala aarguddan lahaayeen dhiiggii hore loo kala daadshay. Waxay illoobeen sidii loo tacban lahaa beeraha loona dhaqan lahaa xoolaha oo ah dhaqan lagu yaqaannay deeggaanka oo taas beddelkeed waxay sii xoojiyeen inay mindiyaha sii soofeystaan ilaa ay gaarreen in Ceelashii biyaha laga cabbi jiray ay isku beddelaan keyd dhiig walaal, waalid iyo wiil lagu daaddiyey oo xitaa xooluhu aan laga warraabin karin, naf kaleba warkeeda daa!

Isla maalintii ay dhacday dhacdadii argagax lahayd ee lagula kulmay ceelkii reer GAAFANE, waxaa isla barqadaasi oo ahayd barqo-kullul oo ka horeysa waqtiga

duhurka, reer GAAFANE u dhashay wiil yar oo loogu magac darray "COLAAD" waxaa la ummullay xilli colaadda labada reer ay gaartay meel qarraar oo u muuqata inaysan soo noqod iyo rajo dambe oo nabaddeed aan lahayn.

Magaca "COLAAD" waxaa loogu bixiyay si uu ugu barbaaro jihada aargudashada iyo dhiig daaddinta. Aabihii, CABDIRAXMAAN, wuxuu ahaa nin sama-fale ah oo nabdoon, waxaana lagu dilay colaadda iyo dagaalka aan jid iyo jihada midna haysan, waxaana lagu darray curadkii reerka, XASAN oo ahaa ilmahii yaraa ee Lix jirka ahaa oo ay aqoonsadeen dadkii deeggaanka subaxii sabtida ahayd ee ay la kowsadeen labadii meyd ee loogu taggay ceelka. Dhacdadaas waxay ahayd isla maalintii COLAAD uu dhashay lana dilay Aabahii CABDIRAXMAAN oo la aqoonsan kari waayey wejigiisa iyo curadka reerka XASAN-YARE. Waxayna sababtay in magaca COLAAD loogu magac darro si uu u noqdo mid dagaalka sii wadda oo aan soo afjarrin.

COLAAD, waa wiil yar oo agoon ah, waxaa gacanta ku hayay adeerkii lagasoo bilaabo maalintii naxliga lahayd ee uu dhashay ilaa xilligan oo uu gaarrey 22 jir xooggan oo caabboon laguna barbaariyey inuu noqdo mid adag oo dhiig daaddin kara, gaar ahaan inuu dillo haldoor ka tirsan reer MAAX oo uu aad ugu han weyna abidkii. Hooyadi FAADUMO waxay noqotay qof xannuunsan oo laga haysto dhanka miyirka, kalama sooci karto maalmaha, dadka iyo xaaladda lagu jiro xitaa uma diiwaan gashana in COLAAD uu wiilkeedu yahay. Miir-qab waxaa ugu dambeeysay kolkii iyadoo ummushay COLAAD, loo sheeggay geerridii seygeeda CABDIRAXMAAN oo ahaa nin sama-fale ah, colaaddana kasoo horjeeday iskuna howli jirray inuu joojiyo dagaalkaas aafada ku reebbay dadkii iyo duunyadii, wallow uu markii dambe u god gallay isaga oo hankiisi aan rumoobin. Garaad iyo garasho waxay kasii guurtay markii curadkeedi XASAN-YARE oo ay ku ildoogsan jirtayna lagu wargeliyey in la dhinac dhiggay Aabahii oo isagana marxuum ah.

Sida caaddada u ah COLAAD, cidda keliya ee uu u dhagga nugul yahay waa Adeerkii la dhashay Aabihii, oo soo korsaday laguna magacaabo XAAJI MUXAMAD, inkastoo uusan weligii dhinac deeggaanka u dhaafin, Cumro iyo Xaj midna uu arag, haddana ma jirto cid ugu yeerri karta MUXUMAD qallalan! Wuxuu COLAAD ka jecel yahay ubadkiisa oo idil, oo xitaa dhaartiisu waa COLAAD, faankiisu waa COLAAD, rajadiisa aargudashana waa COLAAD.

WAARE oo ah saaxiibka la mataanka ah COLAAD ee uu dhallay Adeerkii XAAJI MUXUMAD, oo laftiisu ku korray colaaddan dheerraatay ayaa COLAAD oo xilli casir-liiq ah oo hoos fadhiya geed ka agdhow ceelki Aabbahi iyo Walaalki lagu dul dillay ugu yimid, isago oo u muuqda inuu siddo war uu mahdin doono, kollayba COLAAD oo qosla, kaftamana lama arag, haddana WAARE ayaa intuu la soo farriistay, isaga oo u eg' inuu war qarinaya ku yiri "War COLAADOOOW abshirreyso, warkii aad 22-ka Sanno suggeysay baan maanta soo hellay"

COLAAD oo ku mashquulsan sifeynta iyo dhaqista qorrigiisa ayaa intuu dhinaciisa bidix u jalleecay si daggan ugu yiri "Maxaad haysa maantana, oo aan BARWAAQO-yarrey quseyn?". BARWAAQO waa gabar foodley ah oo uu kor ka ilaashado WAARE, inta badana uu aad uga sheekeeyo habkay dhaanka u doonto, xoolaha u raacdo, walow aysan iyadu marnaba dhinaciisa usoo jalleecin oo ay weli yar tahay, howlahaasna aysan kuba socon. WAARE intuu kusoo dhawaaday oo uu garabka qabsaday COLAAD ayuu ku yiri "War reer MAAX gabar ay dhalleen ayaa deeggaanka si qarsoodi ah ku joogta, waa dadkii belledka (Magaalada) ka yimid oo aqoon iyo wax kaleba wadda oo aan la fahmi karin, kolayba waa haldoor inantu mar haddii ay belledkii ka timid, waana inoo fursad, waxaanse farray kii MOOGE ahaa inuu kor joogteeyo oo ku raad joogo, subaxa hore aroortana deeggaankay ka bixi rabta, intaasa igu maqaal ah"

COLAAD oo fadhiga ka boodday ayaa intuu qorigiisa soo qabsaday u jiheystay dhinaca xad-beenneedka ah ee ay waddaagaan reer MAAX, si uu durba halkaas u dhiggo

meydkeeda, isaga oo xita wax tilmaam ah aan ka haysan, warkana aan hubsan sugnaantiisa. Tallaabtii kowaad markii uu si deg-deg ah u qaaday, waxaa kasoo dabba kacay WAARE oo qoriga kula dhaggay COLAAD kuna yiri …

## COLAAD | QEYBTA 2AAD

"Inanta belledka ka timid keligeed ma aha oo reer MAAX oo aan qof ka marnayn ayaa hareerra (dhinacyo) yaacaya, ma waxay kula tahay inaysan ka war-qabin in adigoo COLAAD ah xilli walba aad ugaarsan karto? waana sababta uu MOOGE u kor joogo ilaa saaka" WAARE warkaas intuu ku boobbay COLAAD ayuu u tilmaamay inaysan u baahneyn xaaladdan fal-celin aan laga baarran deggin inuu ku dhaqaaqo. COLAAD oo weli indhihiisu ay kusii jeeddaan xad-beenneedka ay waddaagaan reer MAAX ayaa isaga oo aad mooddo in korkiisu dhimbiillo dab ah ka kacayaan, si kullul ugu jawaabay WAARE "Aroorta hore adiga iyo MOOGE, ku diyaar garooba jid-yarraha deeggaanka looga baxo".

WAARE qoriga uu sida adag kula dhaggana COLAAD ayuu usii daayey kadib markii uu hubsaday inuu tallaab dambe sii qaaddeyn oo berri loo madlan yahay howlgalkaasi culus. Inkastoo COLAAD weli daymada indhihiisu aysan kasoo labba-noqon reer MAAX jihadooda, waxaa aad ugu muuqda gabadha la sheeggayo inay joogto deeggaanka.

XAAJI MUXUMAD, waa iska oday laftiisu colaad hurrin yaqaan oo aan ku tilmaamneyn nabaddeynta, waana odayga uu sida joogtada ah uga shiddaal qaato COLAAD. XAAJIGA oo markaas ka yimid gar hoose oo u dhaxeysay reer GAAFANE, inkastoo aysan khayr kusoo idlaan gartaasi! ayaa wuxuu ardaaga ku arkay COLAAD oo uu muuqda qof ciil la fadhiya meel cidla ah oo aad mooddo in madaxa looga taagan yahay, haddana inta gacmahana la dabray oo aan waxba qaban karin.

"War COLAADOW, qorrax soo baxa keliya ka xiga in reerkaas (reer MAAX) ay u guurto tacsida aad 22-ka sanno la noolleyd" XAAJI MUXUMAD oo markaas dhex taaggan ardaaga ayaa haddalkaas ku yiri, COLAAD oo aan dhankiisa ka fileyn in Adeerkiisu soo guri noqday, fadhiga ayuu ka kacay, wuxu kusoo dhaqaaqay dhinaca Adeerkii "inaan ku sheeggo ayaan u imid inay berri tacsidu inaga guurreyso oo ay reerkaas u martiyi doonto" ayuu COLAAD ugu jawaab-celiyey Adeerki.

XAAJI MUXUMAD ayaa intuu indhaha-indhaha u saarray COLAAD ku yiri "Warku waa kaa soo horreeyey

wiilkaygiyow, ee aroorta hore sidii Aabaha (CADBIRAXMAAN) iyo curadkiina (XASAN-YARE) loo soo dhiggay ceelka, fal-celin dhacdadaas ka weyn ayan kaaga fadhiya, oo WAARE, MOOGE iyo wiilasha kaleba tiro intaad rabto kasii kaxayso, hana iloobbin in miskiinta yarree ku xabbisan qolkaas mugdiga ah (wuxuu kala jeedda HOOYO FAADUMO oo dhashay COLAAD) inaad xaqeedi u keento, waana hubba in ninkii SAMATAR ahaana warkani uu farxad gellin doono".

SAMATAR waa da'da ka weyn COLAAD oo wuxuu ku dhashay wadno xannuun darran oo waa carruurta ay wadnuhu dalloolaan, si loola tacaalo waxaa lagu qasbanaaday in deeggaanka laga wareejiyo oo belledka (magaalada) loo diro si dabbiib iyo daaweyn loogu helo. Xilligi SAMATAR loo qaadday xaaladda caafimaad COLAAD wuxuu ku jirray uurka hooyadi, oo calaf iskuma aysan hellin inay kulmaan walaalki ka weyn ee SAMATAR oo ah midka keliya ifka uga harray waqtigan, tan iyo markii dhacdadii naxliga lahayd ku dhacday reerkana, way suurta-gelli wayday in SAMATAR deeggaanka lagu

soo celiyo xaalad caafimaad iyo mid amni awgii, oo waxaa mas'uulliyadiisa la warreegtay eeddadii XALIIMA CALI oo la dhallatay Aabahii marxuum CABDIRAXMAAN CALI. Tan ilaa iyo muddadaasi SAMATAR dhowr jeer ayuu isku dayay inuu yimaaddo deeggaanka wallow aan laga oggollaan inuu soo cagga-dhigto, lagana cabsi qabay in sidii Aabbahii oo kale loo dillo ama waxyeello kale loogu geysto.

COLAAD waa u caaddo inuu adeerkii ka dhaggaysto haddalada nuxuusta, kicinta iyo daggaal gellinta ku dhisan, waaba halka keliya ee uu ka shiddaal qaato. Mana haddal badna COLAAD Intuu madaxa u ruxay, isaga oo muujinaya inuu la dhacay dardaarankii Adeerkii ayuu dhaqaajiyey. XAAJI MUXUMAD oo si deymo raacay COLAAD ayaa niyada iska yiri "Maantay rag rabta, waa iga wallee inaysan inantaas nabad deeggaanka kaga bixi doonin, kol hadduu COLAAD seefta galka kala baxay, baroorta reer MAAX deeggaanka laga joogi maayo".

Cadceedu markay sidaa usoo baxday oo aan si buuxda loo waabariisan ayaa waxaa loo wadda kallahay si loo gaarro

goobta, ileen rag shar ku heshiiyey waqtigay la dirirraan oo way dhibsadaan daahista. Sida uu ballanku ahaana COLAAD wuxuu usoo jarmaaday jid-yarraha deeggaanka looga baxo oo ay kusii diyaarsanaayeen WAARE iyo MOOGE oo hubkoodu u dhan yahay. Jid-yarrahan aad looguma safro oo gaadiidka deeggaanka soo galla oo markii horeba farro ku tiris ahaa aad ayay ugu adag tahay inay ku safraan jidkan wadda qodxa ah, dhagaxyadu ka buuxan oo taayarka gaariga aan u roonneyn, dabbayl xooggan oo siigo waddatana waa u dheer tahay hanfi iyo kulleyl darrana waa lagama waayaan.

Haddana COLAAD kuma qaldaneyn saadaashiisu oo jidkan waa midka keliya ee laga dhex dusin karo wax walba oo si qarsoodi ah deeggaanka ku yimaada. Sida muuqatana inanta la rabo in nafta la dhaafiyo, markeedi hore isla jidkan ayay kasoo gashay deeggaanka. Meel bartanka jid-yarraha ku beeggan ayay ku diyaar-garroobeen COLAAD iyo kooxdiisa. MOOGE ayaa wuxuu meel fog ka arkay gaari u muuqda inuu yahay midka xamuulka lagu qaado oo kusoo waajahan dhanka

deeggaanka laga soo galo. COLAAD iyo WAARE oo iyagana barbar taaggana ayaa uu muuqda inay la arkeen gaariga, wallow boorka iyo habaaska ba'an ee ka jira goobta aysan ku suurta-gellineyn inaad markiiba aqoonsato oo aad kala soocdo waxa kugu soo waajahan dad iyo duunyo waxay kala yihiin.

"WAAROW, maanta miyaanay isniin ahayn?!" MOOGE ayaa si la yaableh u weydiyeey WAARE, deeggaanka maalinta khamiista oo keliya ayay gawaaridu yimaaddan kana noqdaan, mararka qaarna maba u suurta gasho inay gawaaridu yimaaddan, gaar ahaan xilliyada jiillaalka iyo colaadduhu is biirsadaan. "COLAADOW, kollayba qolladan (Wuxu ula jeedda gabadha reer MAAX ee la sugayo) ma soo dhawee gaarigan aan hubsano, laga yaaba inay la socoto gabar kale oo reer MAAX ah, si qarsoodi ahna loogu simi rabo gudaha deeggaanka " ayuu WAARE ku yiri COLAAD.

COLAAD oo weli kusii indho-cad jidka deeggaanka kasoo baxa si dhowna u hubsanaya jid-yarraha inay kusoo dhow yihiin reer MAAX oo hadafkiisu yahay, ayaa hal mar si

boobsiis ah ugu war-celiyey oo ku yiri "WAARE adigu halkan si taagnow, MOOGE ku dhaqaaq oo haddii aad fahmi waydo, cidda ay yihiina halkooda dhig (wuxuu ula jeedda isla goobta ku dil si barreera) ujeedku gaarigan inagu soo wajahan ma aha ee iga fududey howsha". Isla markiiba MOOGE oo adeecaya warka la yiri ayaa dhaqaaqay, oo wuxuu joojiyey gaarigi xaamulka sidday ee ku soo waajahna, markii uu darawalkii gaariga arkayna, isla markiiba wuu aqoonsaday oo waaba LAAMBAD nin la yiraahdo oo deeggaanka daggan kana soo jeedda isla reer GAAFANE oo waaba la is aqoonsaday. "Heedhe COLAADOW, waa kii LAAMBAD ahaa, iga wallee midkan meel xun waa ku dhiman doona, maxa jidkan kusoo mariyey? bal hore nooga soco!".

MOOGE Intaas markuu yiri ayuu gaarigi soo dhaqaaqay, markuu COLAAD kuso dhawaaday oo uu si dhaafi rabay, ayuu COLAAD si kedis ah ku arkay qof aad mooddo inuu is qarinayo oo daaqada kale gaariga fadhiya, foolkana u duubban yahay "Joog waryaa, WAARE daaqada kale hubbi iyo cidda la saarran gaariga" ayuu COLAAD cod

kullul oo sarreeya ku yirri. WAARE oo dhibsanaya ayaa ku dhaqaaqay inuu hubbiyo, ileen ninkan LAAMBAD wuxuu la dhashay BARWAAQO-YARRIISAY, waana da'da iyada ka weyn. WAARE si hoose wuxuu isku leeyahay “seeddigaaga mustaqbalka miyaad fatashi maantana” oo rajo ayuu ka qaba inuu la gogol farriisan doono BARWAAQO reerkeeda. Wuxuu isagiina indhaha ku dhuftay oo uu arkay inuu saarran yahay nin u muuqda dadkii reer belledka (magaalada).

Isla markiiba dareenki xishoodka lahaa ee WAARE wuxuu isku beddelay inuu qoriga oo markii horeba amaanka u furna uu la booddo oo uu madaxa ka saaro ninki gaariga LAAMBAD la socday "Magacaa waryaa? reer ayaad tahay?, haddal hana soo eeggine ..." WAARE ayaa gaariga kala soo daggay ninkii. "COLAADOW, walaahi waa runta waa mid reer belledki ah, ileen bahalkan xun (wuxu ula jeedda LAAMBAD) lama aamini karo" ayuu sii raaciyey warkiisi. COLAAD oo aan tixgelin weyn siinneyn ninka la hayo ayaa ku yiri "hadduu warrami diidday oo uu is sheegi waayo, isaga iyo LAAMBAD is dul saar meydadkooda"

LAAMBAD oo cabsi xooggan hayso ayaa ku calaacalay "COLAADOW, Ina Adeer walaahi waa nin reerkeena (reer GAAFANE) ah oo tuuladi ayaa layga soo raaciyey oo waa nin baadi ah oo lunsan oo deeggaankeena ayuuna ku waajahan yahay, anigu damac kale iguma jiro eeen, eeen anigu eeen ..." LAAMBAD oo warkiisa calacaalka iyo beer-laxowsiga leh aan dhammeysan ayaa cod nool oo u muuqda qof geesinimo ku jirta inuu kasoo yeerray, la maqlay.

"magacaygu waa SAMATAR waxaan ahay ina CABDIRAXMAAN CALI, ka dhashay reer GAAFANE, lana dhashay ninkaas (COLAAD ayuu farta ku tilmaamay) halkaa taaggan ee COLAAD la yiraah" Ninka hadalkaasi yiri waaba SAMATAR oo uu qorriga madaxa kaga haayo WAARE, COLAAD oo usoo dhawaaday ayaa garowsaday in ninka dilka ka sigtay uu yahay walaalkii SAMATAR. Shucuurta COLAAD ayaa halmar isku beddeshay si aannu abid noqon, daymo kale oo dheeri ah ayuu u labba celiyey waana hubsaday, Wallee waa walaalkii ka weyn SAMATAR oo gacantiisa ku bixi gaarrey, waana kulankoodi ugu

horeeyey ee ay abid is arkaan. Maxaa keenay? Muxuu soo doonnay? Yaase keennay?

Waxaa dhinaca kale kasoo muuqda gaari kasoo socda dhanka deeggaanka una eg midkii ay suggayeen COLAAD iyo ilma Adeerradiisa, "COLAADOW, gaari ayaa inagu soo waajahan, waana inagu soo dhow yahay" ayuu yiri MOOGE oo ka muuqata wel-wel, madaama xaaladda ina Adeerkii ay isbeddeshay oo laba kacday. COLAAD oo aan weli ka daymo-dhargin walaalki SAMATAR, gudahiisuna uu ka shiddan yahay ollol ayaa si xanaaq leh ku yiri " War MOOGE midkan tooggo, oo meel aan madaxa ahayn haku dhufan". MOOGE ayaa isla markiiba rasaasti ugu horeysay kasoo ridday qorrigiisa toosna ugu ridday xabad aan loo meel-dayin ...

## COLAAD | QEYBTA 3AAD

MOOGE ayaa isla markiiba rasaastii ugu horeysay kasoo ridday qorrigiisa, isaga oo fulinaya amarkii COLAAD uu siiyey, wuxuuna xabbaddii ugu horeysay uu garabka bidix, meel u dhow agagaarka wadnaha kaga dhuftay LAAMBAD, oo aan fileyn inay xabbaddi kusoo waajahan tahay.

WAARE ayaa dhinac u tuurray MOOGE, ma ahee xabbaddu toos ayay sujuudda uga dhici lahayd ninkii LAAMBAD ahaa "War COLAAD ballanku sidaan ma ahayn! inaga dhexdeenna inaan is dilno uma aynaan soo hub aruursan ..." WAARE oo hadalkiisa aan dhammeysan ayaa MOOGE oo karaar kusoo kacay, wuxuu qorriga caaraddiisa ee rasaastii Kowaad kasoo dhacday mar kale kusoo jeediyey LAAMBAD oo dhul-yaal ah oo miir dabboolmay. WAARE intuu isna qorrigiisa ammaanka u furna hubsaday oo yiri "Haddii aad LAAMBAD rasaas Labaad u celiso waa iga Walle midkana (wuxuu ula jeedda SAMATAR oo uu madaxa qorriga kaga haayo) wan bar-bar dhiggaya".

"Cid walba oo qiyaamo la timaada reer GAAFANE, ciqaabteedu waa xannuun aan loo meel da'yin" ayuu COLAAD yiri isaga oo warkiisa dhiillada leh sii wata ayaa wuxuu raaciyey "Dhinac nooga leexi dhaawaca LAAMBAD ee gaarri ayaa inagu soo waajahan hana loo diyaar garoobo, MOOGE adigu midkan (wuxuu ula jeeda SAMATAR oo anfariirsan, halkii uu fadhiyeyna ku qaboobbay oo far nuuxin la') garba-duub gacmaha uga xir oo u kaxee fadhiga SALAAL halkaana ku hay inta aan kaaga imanayno" ayuu COLAAD warkiisa sii raaciyey.

WAARE, waaka dabbacsan yahay MOOGE oo waa qof daggan oo tallaabada uu qaaddayo si aad ah uga baarran dagga', Wallow uu isna shar-wadde kale yahay, isaga oo ka cabsi qaba in LAAMBAD uu ku naf baxo goobta ayuu si dhiirranaan leh ku yiri "COLAADOW, kan hadduu walaalka yahay, LAAMBADNA waa walaalkeen, ama waala wadda qaaddi ama meydadkooda halkan ayaa looga wadda tagaya" COLAAD oo xaaladda ay ku xun tahay ayaa MOOGE farray in LAAMBADNA uu hore ugu qaaddo gaarriga, deeggaankana soo dhiggo dhaawaca darran ee

LAAMBAD, ninkii SAMATAR oo maxbuus ahna kusii haayo Fadhiga SALAAL.

Fadhiga SALAAL waa geed weyn oo aagga reer GAAFANE ku yaal, una dhow ardaaga XAAJI MUXUMAD, waana halka ay ku arrinsadaan oo gollahooduna uu yahay reer GAAFANE oo idil, gartana ay ku gooyaan, kana tabaabusheestaan markay dirirrayaan oo col-doon yihiin. Baddanka waxaa halkaas saldhig u ah wiilasha reer GAAFANE intooda col u joogga ah, COLAADNA wuxuu halkaas u xushay waxay noqon kartaa laba arrin midkood oo waa inuu halkaas ku hayo SAMATAR oo uu nabad-gelyo ku heli karo, madaama uu belledki ka yimid una nugul yahay in xilli walba la waxyeelleeyo ama waxaaba u qorsheysan inuu SAMATAR laftiisu fagaarrahaas ku dhibbaateeyo sidii LAAMBAD xabadda loogu fakiyey oo kale, ileen COLAAD wax walba waaka suurrowda, wayna adag tahay in si sahlan lagu saaddaaliyo qorshooyinkiisa gurracan!.

WAARE oo weli ka shaki qaba in MOOGE uu jidka kusii dilli karo LAAMBAD oo dhaawaca darran ah, wuxuu markii

ugu horeysay ka hor yimid amarkii saaxiibkii, walaalki iyo mataankiisa COLAAD balse xeellad kale ayuu adeegsaday WAARE oo wuu dabbeecad yaqaan ina Adeerkiim wuxuuna ku yiri "Suurta-gal ma aha, gaarrigan inaan labadeena oo keli ah waajahno (wuxu ula jeedda gaarriga kusoo waajahan ee la filayo inay la socoto reer MAAX inantooda), waa lala jiraa oo inantaasi lama soo dirrin keligeed, howshaan aan ka noqono COLAAD oo aan ka baaqsano khasaaro intan ka baddan inaan la hoyano"

"Kaalay adigu kaxey kuwaan, aniga iyo COLAAD ayaa ku harrayna qoladan nagu soo dhow" ayuu MOOGE kusoo dhex gallay warkii uu wadday WAARE. COLAAD wuu hubba in WAARE uu ka khibrad iyo xeellad fiican yahay MOOGE markay joogto col iyo daggaal, waana sababta uu WAARE ula harri rabay. Laba mid ayaa hor-yaalla inuu daggaal gallo WAARE la'aanti oo natiijadeeduna tahay guul darro geeri lagu lamaannay ama inuu talladii WAARE qaato oo inantii loo han weyna dilkeeda laga dhaqaaqo, iyada oo loo jeeddo muuqeeda.

Xaalku meel darran ayuu marraya, gaarrigii soo socday ayaa u muuqday mid istaaggay, waxaana si wacan iskugu muuqda labada reer colkoodi, oo waxaaba gaarrigi kasoo daatay tiro rag hubbeysan oo gaaraya ilaa Shan qof oo difaac iyo daggaalba u diyaarsan si ay inantooda nabad-gelyo ugu sii galbiyaan. MOOGE oo markii dambe WAARE ku waafaqay ra'yigiisa ayaa markiiba yiri "COLAADOW waa run warka WAARE oo raggu waa tashteen, waana inagu adkaan inaga oo aan diyaar ahayn inaan daggaal galno, anigana idin kama taggi karo, maxaa talo ah?"

"Adiga iyo WAARE dhaqaajiya, aniga iyo colka isku kay fasaxa" COLAAD oo dhiirranaantii lagu yaqiinnay ku hadlaya ayaa intaas yiri. Gaarriga ay kasoo daateen Shanta rag ee hubbeysan waxay u muuqdaan kuwa difaac keliya u diyaarsan oo aan daggaal u socon, waxay keliya ay rabaan waxay tahay inay samata-bixiyaan inanta reerkooda ah, ee looso ugaarsiga taggay, ileen rag coldoon ah way is garran og’yihiin "COLAADOW, isma-biimeyn karno, tallo hadda ayay inoo dhowdahay aan dhaawaceena (LAAMBAD ayuu ula jeedda) qaadno,

fursad kale waa la heli karaa" ayuu WAARE yiri si uu u darreensiyo waaqica rasmiga ee lagu jirro iyo sida uu qorshahoodu iskugu beddelay daaddinta dhiigga ina adeerkooda reer GAAFANE, halkii laga daaddin lahaa dhiigga inanta reer MAAX.

"ina dhaqaajiya" warku intaasu kusoo koobbay COLAAD. Goobtii ayaa laga soo noqday, iyada oo SAMATAR uu garba duub u xirran yahay, LAAMBADNA nollol iyo geeri u dhaxeeyo. Gaarrigi xamuulka sidday ee uu ku shaqeysan jiray LAAMBAD, waxaa markan darawal ka ah MOOGE, wuxuuna ku ag qabtay oo uu is taagay halkii loo socday ee fadhiga SALAAL oo raggii iyo xooggi reer GAAFANE oo dhammi ay wadda fadhiyaan, iyaga oo hubba in COLAAD uu siddo war reerka farxad gellin doona, lana wadda suggaayey, ayaa waxaa gaarriga kasoo daggay WAARE oo leh "War kaallaya ila qabta LAAMBAD". Waaba LAAMBAD oo dhiig baxay. Cidna sabab isma weydiin oo gurmad-fiddin ayaa loo kala orday. Wallow deeggaanku uusan lahayn hal goob oo caafimaad ama

wax u dhow daryeel caafimaad oo ruux liita oo daryeysan lagu dabbiibi karo, mid dhaawac ahna warba uma yaal.

Jawigi ayaa is beddellay kadib markii lala carraray LAAMBAD dhaawici oo u muuqdaba sidii qof naf baxay, XAAJI MUXUMAD oo goobta ku suggan, darreemayna inay wax weyn qaldan yihiin ayaa COLAAD soo dhinac istaagay kuna yiri, "LAAMBAD, maxaa ku dhacay? yaa dhinac-dhiggay wiilka? inantii warkeedana halku ku dambeeyey?" XAAJIGU dadkii oo aan darreemin ayuu si buuxda u fahmay in COLAAD uu kusoo fashilmay ugaarsiga dhiigga reer MAAX, hareerraha waxaa taaggan reer GAAFANE intooda ugu xoogga-roon, magac iyo mansab ahaan, MOOGE oo raba inuu difaaco saaxibkii ayaa yirri "LAAMBAD, waa dambiille oo colkii aynu u hub qaaddanay, fashilkeeda ayuu leeyahay, ciqaabtaas awgeedna aniga xabbadda ku dhuftay..."

LAAMBADKA dhaawaca ah walaalkii oo goobta taagna ayaa isla markiiba darreen-kacay oo kusoo carraray si uu MOOGE ugu gacan-qaaddo, ileen waa walaalki qofka dhinac-yaalka ah. COLAAD ayaa durba kor u ridday laba

xabbaddood oo u muuqda digniin-digniin "MOOGE aniga amray ee ninkii MOOGE ku socdow igu soo hormar" xaalku haddana mar kale ayuu xargaha goostay, reer GAAFANE dhexdooda ayaa isku hub-qaatay. XAAJI MUXUMAD ayaa COLAAD garrab-qabtay. Halkaas markay marayso cidna ma oga inuu gaarriga xamuulka ee LAAMBAD leeyahay uu saarran yahay SAMATAR oo COLAAD la dhashay, sababta LAAMBAD loo waxyeelleeyeyna ay tahay SAMATAR awgii. Haddii la oggaado xiisaddu way kasii darraysa.

"Waa kuma ninka garba-duubka u xirran ee gaarriga ku harsan?" XAAJI MUXUMAD ayaa weydiiyey MOOGE oo uu wuxuu isleeyahay mid reer MAAX miyey soo afduubbeen, waaba asbshirre! MOOGE way ku adag tahay inuu markan si dhiirran ku jawaabo oo uu yiraahdo waa COLAAD walaalkii, iyada oo LAAMBAD walaalkiina u darreen kacsan yahay dhinaca kalena lagu hayo oo la dajinayo. "Waa SAMATAR, walaalkay ayaa saarran oo LAAMBAD ayaa keennay deeggaanka, cid aan aniga ahayna uma dabrana SAMATAR, cid tallaab u qaaddi

kartaana ma jirto" ayuu COLAAD si cad oo qeexan u yirri. XAAJI MUXUMAD oo warkaas ka naxay ayaa u dhaqaaqay dhinaca SAMATAR, isaga oo garabka sii daayey COLAAD una tallaabsaday si uu ugu dhawaado SAMATAR. COLAAD rasaas seddexaad ayuu kor u ridday "Xitaa Adiga Adeer" ayuu ku yirri Adeerkii XAAJI MUXUMAD oo ku waajahna gaarriga. SAMATAR hallis ayuu ku jira oo waxaa suurta gal ah in LAAMBAD walaalkii uu nafta dhaafiyo. Wallow uusan si sahlan ugu dhiirran karin inuu ku dhaqaaqo oo la hayo.

COLAAD qorrigiisa maku difaaci kara walaalkii oo mar kale ma dilli doona mid kale oo reer GAAFANE ah? mise isaga ayaaba la dilli doona oo dhiig walaal daaddiyey? "Ma anigaad rasaas igu joojisay COLAADOW?" XAAJI MUXUMAD oo tallaab kale qaaddi waayay ayaa intaas si xanaaq leh u weydiiyey COLAAD ...

## COLAAD | QEYBTA AFRAAD

COLAAD si geesinimo leh ayuu weli qorriga ugu sii dhaggan yahay, haddana way ku adag tahay inuu ka jawaab-celiyo weydiinta Adeerki uu weydiiyey. MOOGE isagu, labada dhinac meel uu raaco oo uu door-biddo ayuu la'yahay, halkiisa ayuu aamusnaan la taaggan yahay, oo cid ku dhiirran karta in XAAJI MUXUMAD ay ka dabba-hadaaqda ma jirto.

WAARE oo dib ugu soo noqday Fadhiga SALAAL ayaa arkay inay xaaladdu cakiran tahay, kana adag tahay sidii uu saadaallinaayey. XAAJI MUXUMAD oo indhuhu gadduudan yihiin ayaa goobta ka dhaqaaqay. XAAJIGU weligi kama xanaaqin COLAAD oo dhabbarka uma jeeddin ka hor dhacdada maanta dhex martay, isaga oo socodkiisu sii luuddayo una ekaa nin tabbar dhiggay oo col kasoo horjeeda ay si ba'an usoo jebiyeen ayuu ka ruqaansaday goobta, waxuuna kusii dhawaaday hoygiisa.

Reer GAAFANE intii fadhiga SALAAL ku sugneyd ayaa iyagana kala darreerey oo wax kale oo loo harra maba

jirraan, kol haddii COLAAD qorrigiisu reer GAAFANE kusoo rogaal-celiyey!

Jawiga goobta wuxuu u muuqda mid xaalkiisu soo yarra daggay, oo waxaa isugu soo harray COLAAD oo ay wehliyaan WAARE iyo MOOGE oo keliya. COLAAD wuxuu gaarrigi Xamuulka ahaa kasoo dejiyey walaalki SAMATAR oo weli sidiisi u dabran. Xannuun uu wehliyo daal farra baddan iyo fajac aan tafsiir lahayn ayaa dusha ka saarran ninkii SAMATAR ahaa oo si rasmi ah usoo cagga-dhigtay deeggaankii uu ku dhashay.

"Xarriga ka fur COLAAD, dhexdeena qof reer GAAFANE ah laguma dabro" WAARE ayaa intaas ku yiri, isaga oo u muuqda mid u naxaya SAMATAR durruufta adag ee uu ku jirro awgi, wuxuuna ka dhaqaajiyey goobta isaga oo aan hubsan in laga furray iyo in kaleba. MOOGE qorrigiisa ayuu sii garrab-raaracsaday, isagana kama dabba-harrin WAARE oo wuu saan-raacay.

"Hooyo, halkee joogta?" SAMATAR ayaa weydiiyey walaalki COLAAD isaga oo weli garba-duub u xirran. Halkii

uu ka sugayey inuu jawaab-celin helo ayuu COLAAD su'aal ugu jawaabay "War Maxaa ku keennay Deeggaanka?" SAMATAR sida COLAAD oo kale uma madax adka oo durba wuu u jawaab-celiyey "Hooyo iyo Adigan idin soo doonnay". COLAAD oo aan jawaabtaasi si wacan ugu qancin ayaa wuxuu lasoo baxay toorrey af goddan leh oo labada dhinac wax ku goysa, markaasu Gacmaha kaga furray ninkii SAMATAR ahaa oo kaga jarray xarrigi u uku dabrana.

"Hooyo halkee joogta?" Ayuu mar labaad SAMATAR u labba-celiyey. COLAAD isagu wuxuu ku howlan yahay inuu ka fikiro sidii uu deeggaanka uga saarri lahaa walaalkii oo uu ugu celin lahaa belledkii uu ka yimid. SAMATAR hadal kaleba ma hayo aan ahayn inuu ku celceliyo raadinta aragga Hooyaddii ee uu xiisaha darran u qabo. COLAAD waa isma-lure weynaaday intuu farta ugu fiiqay meel kasoo horjeeda, cabaarna u jirta oo uu ka dhisan yahay aqal yar oo dusha sarre ka burbursan, dayac xooggana uu ka muuqda, ku yiri "Aqalkaas yar ee soo jeedda ugu gal, kollay ku aqoosan meyso, kumana garran

doonto, ha warreerin ee hore uga soo bax?, caawa halkan kuma baryi doontid'e"

SAMATAR ayaa u tallaabsaday jihadii uu COLAAD u tilmaamay si uu u gaarro aqalka yar ee uu filayo inay ku jirto Hooyadi FAADUMO oo uusan indhaha-saarrin muddo 22 sanno ka badan, duruufaha colaaddeed ee deeggaankooda ka jira awgii. SAMATAR xog-oggaal uma aha in hooyadiina ay ku xabisan tahay aqalkaas yar muddo 22 sanno ah oo ay miir-beeshay, laguna tiriyo dadka xannuunsan ee deeggaanka ku dhaqan. Keliya wuxuu si buuxda ah uga war-qabaa, kuna barraarugsan yahay in Aabihi CABDIRAXMAAN iyo Curadkii reerkooda XASAN-YARE lagu dilay colaaddahan.

Intii uu soo garaadsaday wuxuu baddi-goobbayey Walaalki COLAAD iyo Hooyadii FAADUMO inuu mar un la kulmo, wuxuu ehelkii uu kula noolla belledka caddaadis ku saarri jirray la kullanka qoyskiisa. Nasiib darro waa laga hor taagna inuu deeggaanka yimaado oo u kasoo war doonno reerkii, iyada oo laga cabsi qabay in la dhibbaateeyo. Dhuumasho iyo dhiirranaan ayuu ku yimid

doorkan, isaga oo marar baddan oo hore ay ka fashilantay inuu yimaado deeggaanka.

Imaanshiyahiisa, wuxuu kasoo marray halis baddan, wuxuuna u barreeray inuu la kulmo reerkiisa ama in la dhibbaateeyo isaga oo baaddi-goobbaya la kullankooda. Wuxuu filayay inuu boggaadin, marxabbeyn iyo laab-gellin kala kulmi doonno walaalki, kolka uu indhaha-saarro oo uu isku sheeggo taas beddelkeed, imaanshiyahiisa wuxuu gallaaftay nolosha LAAMBAD oo halis ku jira, wuxuuna isagiina ku suggan yahay xaalad adag oo nollol iyo geerri u dhaxeysa. Reer MAAX inta aan la gaarrin, reer GAAFANE dhexdii ayaa laga yaaba in lagu dhex dhibbaateeyo. Hubaalna ma aha inuu bad-qab ku noqon karo oo uu ku tagi karo belledka.

Intaasba uma muuqato oo wuxuu usoo dhawaaday aqalkii yarraa, marki uu maaggay inuu gudaha u galo ayuu dib usoo jalleecay mise waxaa u muuqda walaalkii COLAAD oo qorri ku hubeysan, kana duwan intuu ka filayay inuu noqon doono, isaga oo intaas ka calool-xun ayuu madaxa kusoo bilowday aqalkii yarraa, mise waaba

qof dumar ah oo da' weyn. Waxaa wejigeeda ka muuqda diif aad u darran. Urta aqalka kasoo go'aysa ma aha mid loo adkeysan karo, lugta bidixna waxaa kaga xirran silsilad daxallaysatay, iyada oo cijiyahana ay intooda baddan wadda daateen. Tixsi (duqsi) ayaa korkeeda ku lammaan oo wasakhda jirkeeda saarran ayay miciin-bidayaan. Waxay jirkeeda u xoqaysa si ba'an ilaa heer faraheeda ay wadda dhiig da'aya noqdeen. Ma foraarsan karto, mana sarra kici karto oo dhinac-yaalka ku batay sannadihii dambe oo dhammi jiifkaas ayay ku roon tahay. Wallow uu jirkeedu dhinac ka mid ah uu burburay.

"War adna yaad inoo ahayd, iga tag waryaa, soco" Intaas ayay Hooyo FAADUMO kusoo dhaweysay waana hadal ay cid walba ku tiraah, oo intuu SAMATAR uu soo gelin ayaa caruur yar-yar oo ka horeysay dhib ku hayeen. SAMATAR oo aan ku war-qabin xaaladda Hooyadi, ayaa darreenkiisi celin waayey oo ilmada ayaa indhaha soo dhaaftay. Xannuun baddana, marka Hooyo ku dhashay oo kugu hor daryeeysan ay ku muuqato, kuna aqoonsan la'! SAMATAR tallaab ayuu dhankeeda usoo qaadday "War iga joog, Alla

Hooggayay iga celiya" intay afka furratay Hooyadi ayay intaas ku qeylisay, iyada oo is leh iska eryi. Cid walba col ayay u aragta geerridii seygeeda iyo curadkeeda kadibna garowshiyo ma laha Hooyo FAADUMO.

"Hooyo, Hooyo waa SAMATAR wiilkaagi, Hooyo" ayuu SAMATAR ku boobbay Hooyadi, weligeedba ma aysan arag qof ilmeynaya, oo iyadana soo miciin biddaya, si la yaab leh ayay cabbaar ugu daymootay, markaasay ku tiri "idaa, war idaa, MUUSOW bal kaalay kana iga celi" Mid deeggaanka daggan oo iyada u diir-naxa oo MUUSE la yiraah ayay qeyla-dhaan uga dirratay wiilkii ay dhashay oo ay aqoosan la'dahay.

SAMATAR oo calool-hursan ayaa kasoo baxay aqalkii yarraa. COLAAD oo isna kusoo dhawa aqalkii ayaa so dul istaagay. SAMATAR ayaa ku darreen boodday walaalki, isaga oo la dagaallamaya kuna yiri "Hooyo, maxaa ku dhacay? yaa xirray Hooyaday?" COLAAD ayaa intuu iska furfuray, dhinacna isaga tuurray, ayuu qorrigiisana gacanta u saarrey kuna yiri "Reer MAAX ayaa u wacan xaalka Hooyo, ee orod oo kasoo aar ama ...

**COLAAD | QEYBTA SHANNAAD**

“… ee orod kasoo aar ama dib ugu noqo belledkii aad ka timid".

SAMATAR, waxaan quus ahayn uma muuqato, weligi qorri uusan gacantiisa saarrin ayaa maanta loo gacan-gelliyey, waxaaba intaa uga darran, arxan-darrada COLAAD haysata iyo sida aannu ugu damqaneyn Hooyadi oo xaaladdaas adag ku jirta. SAMATAR naftiisu wuxuu weydiinaya, sidee suurta gal ku tahay, wiil Hooyadi ay maxbuus tahay, haddana aan u diir-naxayn?! Mucjiso ayay la tahay. COLAAD geestiisa, wuxuu weli ku howlan yahay suurta-galnimada, sidii uu deeggaanka uga saarri lahaa SAMATAR, wallow aysan u sahlanaan in isla maanta uu dib u celiyo. Deeggaankana cid habbeen guurreyn kartaa ma jirto, gudcur farra badan ayaa jira oo jid iyo jiho dhinac aad u socotana way adkaan inaad kala garato.

"Caawa halkan ku hoyo, Aroorta hore MOOGE ayaa kusoo doonnaya" COLAAD ayaa SAMATAR ku yiri warkaas si uu u ogeysiiyo in subaxa hore qorshuhu yahay in deeggaanka

laga saaro. SAMATAR warkaasba kuma socdo oo weli wuxuu u calool-buka xaaladdii uu ku arkay Hooyadi, COLAAD oo aan warkii dhammeysan ayuu ka dhaqaaqay, dib ayuu ugu noqday aqalkii yarraa ee ay ku jirtay HOOYO FAADUMO.

Si kasta oo ay u xannuunsan tahay, haddana darreen Hooyanimo ayaa ku dhex nool. SAMATAR kolkan markuu aqalkii yarraa soo gallay, kuma aysan qaylin sidii lagu yaqiinna, intuu soo jilba dhigtay ayuu si daggan isugu dayay silsiladii ku daxalaysatay inuu uga furro, inkastoo ay ka cabsi qabto inuu waxyeeleeyo oo war aan si wacan loo maqleyn, in la fahmana ay adag tahay ayay si hoose ah u leedahay "Maad na daysid, addd..." Warkeedu mid si sugan loo garran kara ma aha, haddana SAMATAR way u suurta gashay inuu ka furro silsiladi xumeyd ee ay ku xirneyd sannadihii dambe. Iyadu weli waa dhinac-yaal, wuxuu isku dayay inuu soo kiciyo oo uu aqalka kasoo saarro, si ay hawo u hesho. Xannuun ayay la kici wayday oo way taahaysa, markasta oo uu korkeeda taabto. Tabar iyo itaal ay ku kacdana ma laha.

SAMATAR intaasba waxaa indhahiisa ka socda ilmo aan dhammaad lahayn oo ay sabab u tahay damqashada xaaladda ay ku sugan tahay Hooyadi. Doorkan way aqbalsan tahay inuu jirkeeda usoo dhawaado oo uu u diir-naxo. Haddana hoos ayay hadallo aan macnahooda sugneyn weli kasii wadda. SAMATAR madaxa ayuu u lullaya si uu u darreensiiyo inuu fahmayo hadalladeeda oo uu la dhacsan yahay.

COLAAD oo muddo ka badan Shan Bilood aan usoo dhawaan aqalkii yarraa, ayaa madaxa lasoo gallay si uu u hubsado waxa ka dhex socda. Wuxuu markii ugu horeysay noloshiisa arkay Hooyadi oo aan silsilad ku xirneyn oo haddana aan sidii qof dhimirka la' qaylineyn oo aan lahayn ficilada gurracan ee lagu yaqiin dadka xannuunsan. Si dabacsan ayuu SAMATAR kolba ugu sii dhawaanaya Hooyadi oo tixsiga (duqsi) uga qaadaya korkeeda. Inkastoo uskaga jirkeeda saarran ay adag tahay inuu gacmo-qallalan ku nadiifiyo.

COLAAD, wuxuu u muuqda qof darreen-qushuucay oo wuxuu si aadda ugu daymoonaya xaaladda dhex

marraysa Hooyadi FAADUMO iyo walaalki SAMATAR. Wuxuu rabbay inuu aqalka kasoo saarro SAMATAR si uu u geeyo hoyga uu qorsheeyey inuu caawa ku baryo, si subaxa hore uu MOOGE halkaas uga darro. Wuxuuna filayay in Hooyadi aysan aqoonsaneyn SAMATAR kuna dhibban tahay ag joogiisa una baahan tahay cid ka kaxaysa. Dhacdo ka duwan intaas ayuu la kowsaday oo waaba SAMATAR oo Hooyadi ag fadhiya oo daryeel iyo naxriis intuu awooddo cagaheeda hoos dhiggaya. Way ku adkaatay ninkii COLAAD ahaa inuu SAMATAR kaxeeyo. Kollayba kama yeelleen inuu Hooyadi ka ag tago. Waxaa irrida usoo istaagay WAARE oo is tusay inuu u taaggan yahay.

COLAAD, ayaa kusoo baxay isaga oo leh "Aroorta hore ayuu SAMATAR ka bixi doonna deeggaanka, howshaasna MOOGE ayaan u xil saarraya" WAARE sidii uu ku ahaan jirray COLAAD kuma aha oo fur-furnaan iyo qaabillaad fiican kama muuqato. "Aabe (wuxuu ula jeedda COLAAD Adeerkii XAAJI MUXUMAD) ayaa ku yeerraya, ina keen" ayuu WAARE ku war billowday isaga oo ay ka muuqato

walwal iyo walaac farra badan. "Aniga ayaa u taggaya ee adiga halkan si joog intan kasoo noqonayo" intaas ayuu COLAAD ugu war-celiyey WAARE oo aysan isku wanaagsaneyn sidii saaka LAAMBAD loo dhaawacayba.

Qorrigiisa ayuu u reebbay WAARE oo aan qorri haysan, taas waxay muujinaysa in COLAAD uu qabo darreen walaalnimo, kana cabsi qabo inta uu maqan yahay in la dhibbaateeyo SAMATAR. Waxayna sidoo kale muujinaysa ina-Adeerkii WAARE inuu yahay qofka uu ku kalsoon yahay ee uu ku aamminay bad-qabka walaalki SAMATAR, si kasta oo ay xaaladda dhexdooda u cakiran tahay, haddana WAARE waa nin shaqsiyad adag leh oo qorriga intuu ka qabtay ayuu ku yirri "Aniga ku harri halkan, ee adigu Aabo u tag".

Waa xilli fiid ah COLAAD, markii uu soo gaarray ardaaga, wuxuu kor ka arkay Adeerki XAAJI MUXUMAD oo hoos fadhiya geed yar oo ku dhex yaalla ardaaga, inkastoo geedkan uusan lahayn wax caleema-qoyan ah, haddana wuxuu ka mid yahay kuwa ugu roon ee la harsan karo

kuna yaal deeggaanka, marka laga yimaad geedka weyn ee ku yaal fadhiga SALAAL!

XAAJIGA oo markaas ooggay salaada Maqrib ee ku waajibka ahayd, kuna fadhiya salli, ayaa cod nool oo meel fog laga maqli karo ku yirri "War COLAADOW, maanta waxaad reer GAAFANE yeeshay, waxaan kaa filayay inaad reer MAAX yeelli doonto". "Reer MAAX, si walba igaga nabad helli maayan oo dhiiggi Aabahay iyo Walaalkay wan uga aarri doonna" COLAAD oo aan usoo dhawaan Adeerki ayaa ku war-celiyey hadalkaas.

"Reer GAAFANE, xeer ayay leeyihiin oo wiilal ay dhalleen dhexdooda laguma dillo, mid ka mid ah iyagana ma dilli karo mid kale oo reerka ah, LAAMBAD waa naf baxay oo si arxan darro ayuu u geeriyooday, wuxuuna ku dhintay rasaastii kasoo baxday qorriga MOOGE, anigana waxaan dhowraya xeerka reerka u dagsan, oo MOOGE ayan ku wareejiyey reerka LAAMBAD, oo sida ay doonnaan haka yeeshaan, berri ayaa isagana lala aasi doonna LAAMBAD" XAAJI MUXUMAD ayaa ku war-geliyey COLAAD in ninkii MOOGE ahaa caawa lagu wareejiyey reerka uu ka

dhashay LAAMBAD oo geeriyooday, si ay iyaguna MOOGE u dillaan ama u daystaan, kollayba dayn maayaan. COLAAD oo ka naxay warkaas ayaa wuxuu dhinaciisa bidix ku arkay qorrigii MOOGE oo rasaas buuxa, intuu dafay ayuu si carro leh ugu tallaabsaday hoyga reerka LAAMBAD ee geerrida u taal lana jaar ah Adeerkii XAAJI MUXUMAD, dhinac kalena uu MOOGE maxbuuska u yahay ee lagu wareejiyey taladiisa.

XAAJI MUXUMAD markuu arkay inuu COLAAD hub-qaatay ayuu ku yirri "Tallaab haddii aad u qaaddo reerka LAAMBAD, geerrida xigta waa SAMATAR". Xaalku marka uu halkaasi marayo, dhowr rasaas ayaa hal mar si darandoorri ah loo maqlay, waxay ka dhacayaan meel aan ka fogeyn jihada aqalkii yarraa ee Hooyadi iyo SAMATAR ay ku sugnaayeen, oo WAAREna uu kor-joogga ka ahaa. Cabaar yar kadib waxay maqleen qof leh cod cabsi iyo argagax ka muuqdo oo dhinaca ardaagii ay jooggeen usoo ordaya "Alla waala dillay, Xabaddo ayay ku furreen Walaahi ..." Ayuu lasoo gallay MUUSE nin la yiraah oo xoolaha u raaca XAAJI MUXUMAD. Rasaasta sidaas u

dhacaysa kollayba waa hubbaal WAARE, SAMATAR ama HOOYO FAADUMO qof un way halleeshay ...

## COLAAD | QEYBTA LIXAAD

Cabbaar yar kadib waxay maqleen cod cabsi iyo argagax ka muuqdo oo dhinaca ardaagii ay jooggeen usoo ordaya "Alla waala dillay, Xabad ayay ku dhufteen Walaahi ..." Ayuu lasoo gallay MUUSE nin la yiraah oo xoollaha u raaca XAAJI MUXUMAD. Rasaasta sidaas u dhacday kollayba waa hubbaal WAARE, SAMATAR ama HOOYO FAADUMO qof un way halleeshay. Waa haddii rasaastaasi lagu weeraray aqalkii yarraa ee ay ku sugnaayeen.

MUUSE waa nin oday ah oo da' ahaan gaarraya 60 jir. Wuxuu ku korray deeggaanka uu intuu noolla ay colaaddo aan dhammaad lahayn ka socdeen, MUUSE waa nin waayo-arag ah, waxa uuna ka mid yahay dadka tirada yar ee ku sifeysan naxriis iyo nabad jaceyl. Weligi ma uusan qaaddan hub nooc kasta oo la heli karo si uu u dagaal gallo. Madaama uu qof dabacsan yahay, reerkiisa (waa reer GAAFANE), waxay ugu yeerraan fulay aan waxba tarin, dhiigna daaddin karin laguna tiriyo maatida reerka, looma guurrin oo cid walba uu gabar ka doonto way hagradaan, dhowr jeer ayuu damac guur lasoo kacay,

waase u suurta gelli wayday, intaas kadibna damaciisa guurka ma uusan si waddin, waana nin inta badan la riixo oo la liiddo. XAAJI MUXUMAD ayaa u yar roon oo wuxuu u-xil saarray inuu xoollaha u raaco si uu halkaas uga helo nollol-maalmeed aan macno weyn lahayn.

Madaama oday MUUSE uusan hub-qaadashada ku fiicneyn. COLAAD oo markii horeba col-doon ahaa iyo adeerkii XAAJI MUXUMAD ayaa u wadda kicitamay aaggi ay xabbadaha ka socdeen. COLAAD oo lugaha si isdaba-joog ah u qaaddaya, ayaa ka saan-dheerreeyey Adeerkii iyo oday MUUSE, wuxuuna isaga oo wadnaha farta ku haya soo gaarray aqalkii yarra ee uu kaga taggay WAARE oo kor joogge ka ahaa Walaalkii iyo Hooyadi. COLAAD wuxuu kusoo dhawaaday aqalkii yarraa oo bannaankiisa uu ka muuqdo inuu yaallo qof la dhinac-dhiggay balse aan si fasiix ah loo aqoonsan karin in lasoo dul istaago mooye. Garaaca wadnihiisa ayaa sii Labba-jibaarmay. Ugu dambeyna wuxuu soo dul istaaggay qofkii uu dusha sarre kasoo arkay, mise waa WAARE oo ay xabbaduhu

halleelen, waa sida uu sheeggay Oday MUUSE oo way dilleen intay rasaas aan kala joogsi lahayn ku furreen.

COLAAD abidkiiba wuxuu lahaa dhiirranaan iyo ad-adayg, lagumuna aqoon cabsi iyo argagax balse doorkan way ka duwan tahay, hal mar ayuu jilbaha dhulka dhigtay, gacmahana way gariirayan oo qorrigii xitaa wuu haysan kari waayay, kolba dhinac ayuu u roggaya WAARE meydkiisa oo rajo ayuu ka qaba "WAARE, WAARE ila hadal, WAARE ..." ayuu COLAAD ku cel-celinaya. WAARE waa kici diidday, COLAADna wuxuu xaqiiqsaday in naftu ay daysay WAARE. Rag hubbeysan oo tiradoodu gaarrayso Affar ayaa weerar kusoo qaadday aqalkii yarraa, yoolkoodu wuxuu ahaa inay SAMATAR dillaan oo ay ku war-helleen inaan weli deeggaanka laga saarrin oo lagu hayo aqalkaas yar. WAARE oo iska caabbin sameeyey ayaa la dagaallay raggii balse col ka weyn ayaa isku soo biirsaday, xilli habbeen-madow ahna way ahayd, way ku adkaatay inuu keligii jabiyo colkaas ama uu iska caabbiyo, tabar intuu haayay iyo ka badan ayuu gelliyey, ugu dambeyna isagay halleeshay Sagaal xabbadood oo Shan

ka mid ah ay ka halleeleen aagga wadnaha iyo uur ku jirta, nafna dhul lama uusan dhicin.

XAAJI MUXUMAD iyo Oday MUUSE oo socod gaabinayay ayaa soo gaarray aqalki yarraa, iyaga oo toosh yar hore usoo qaatay si ay iftiin uga hellaan oo ay wax ku arki karaan. XAAJIGA ayaa isha saarray meydka wiilkiisi WAARE oo dhul-yaal ah. Markiiba wuu gartay inaysan naf ku dambeyn inankiisa oo inuu sii taagnaado ayaa ku adkaatay, ilmadu indhihiisa ayay idan la'aan soo dhaaftay. Weligiiba isaga oo ilmaynaya indhaha lama saarrin oo waa COLAAD oo aan biyo ismarin! "Kana ma dilleen?" Ayuu XAAJI COLAAD cod yar oo daciif ah ku yiri, afka ayuu furtay oo meydkii WAARE ayuu ku dul baroortay. Oday MUUSIHII la liiddi jiray ayaa dhinaciisa ka bilaabay sabarsiin, wuxuu geesta kale ka arkaa ninkii COLAAD ahaa oo shoogsan balse aan sidii XAAJIGA oo kale aan afka furran oo baroorraneyn. "COLAADOW, ma cid kala la joogtay WAARE?" Oday MUUSE ayaa COLAAD intaas weydiiyey.

COLAAD, markuu intaas maqlay ayuu barraarugay, waxaana maankiisa kusoo dhacay Walaalkii iyo Hooyadi xaalkooda inuu doonno, wuu kacay wuxuuna ku orday aqalkii yarraa, wuxuu arkay Hooyadi oo badqabta balse sariirta aan ku jiifin una muuqata inay kasoo dhacday, dhinaca kale ayuu eeggay wuxuu arkay SAMATAR oo dhaawaca ah oo hiraahiraya, neeftuna ay ku adag tahay inuu qaato. Hooyo FAADUMO ayuu kasoo dul taggay oo SAMATAR ayuu soo qaadday oo uu dibbada usoo saarray "Kaalay, ila qabo waa dhaawac walaalkay" ayuu COLAAD ku qeyliyey si uu gurmad u hello. XAAJI MUXUMAD wuxuu markii ugu horeysay arkay COLAAD oo dareen naxriis iyo walaalnimo ka muuqato. XAAJIGU wuxuu durba xaqiiqsaday inuu SAMATAR saameyn aad u xooggan ku reebbay ninkii ma damqadaha ee COLAAD ahaa.

Reer GAAFANE oo wadda dhan ayaa goobti gurmad ahaan usoo wadda gaarray, qeyb ka mid ah COLAAD ayay la qaaddeen SAMATAR oo dhaawac ah,xabbadna ay ka dhinac martay dhabarka dambe oo aan si toos ah u gellin,

balse u muuqda qof dhaawac darran ah oo hadalkana uu dhib ku yahay, ayaa wuxu yiri "Hooyo, COLAADOW Hooyo" wuxu ugu baaqaya in Hooyadi loo gurmado oo ma hubo mana oga inay badqabto oo Alle uu ka badbaadiyey rasaastii oodda looga qaaddey aqalkii yarraa ee ay ku jireen. Markiiba qeyb kale oo gurmadkii u yimmid ayaa gallay aqalkii yarraa si ay usoo qaaddan Hooyo Faadumo. Intii kalena meydka WAARE ayay soo qaaddeen oo ardaagi Xaaji MUXUMAD ayaa la dhiggay.

Weydiimo ayaa la isku tuur-tuurray. "War yaa dillay WAARE? yaa xilligan colka inagu soo qaadday?". Jawaabtu waa iska fududahay Reer MAAX ayaa tuhunka ugu weyn la saarray oo waxaa la bilaabbay hub-aruursi xooggan, si loo dagaal tago. Waa markii Labaad oo ay ku dhiirradeen Reer MAAX inay xadka kasoo tallaaban. Markii Kowaad waxaa si arxan darro ah loogu dillay COLAAD Walaalkii XASAN iyo Aabihii oo ay meydadkooda soo dul-dhiggeen ceelkii reer GAAFANE, markan Labaadna intay soo tallaabeen ayay meydkii WAARE dhiggeen, oo SAMATARna dhaawac uga taggeen.

"Reer GAAFANE ma aha cida weerarka soo qaadday, ee LAAMBAD walaalkii weeye, isagana dillay WAARE" ayuu SAMATAR ku dhahay walaalki COLAAD iyo intii gurmadka kula socotay ee goobta la taagna, isla Ardaaga dhinaciisa kale ayuu SAMATAR yaalla dhaawaciisa oo dhiig joojin iyo la tacaallid lagu wadda. Haddii hareerraha la eeggay waaba run oo LAAMBAD walaalki ma joogo goobta. Waxaa markiiba soo hadlay COLAAD oo cod kullul ku yiri "CAWIL aaway?" CAWILka uu naadinaya COLAAD, waa LAAMBAD walaalki ka weyn oo waa ninki xilligii duhurradii ahaa u farro-baxsanaayey inuu MOOGE ku dhex dillo fadhiga SALAAL. Reer GAAFANE waxay hubsadeen inuu CAWIL goobta ka maqan yahay. Reer GAAFANE intii gurmad usoo baxday ayaa bilaabbay inay baaddi-goobbaan CAWIL oo lasoo qabto si loo hubsado warka uu SAMATAR sheeggay.

Waxa la yaab la ah reer GAAFANE oo ay la wadda fajacsan yihiin, musiibada hal maalin gudahii reerka asiibtay! Subaxdii hore MOOGE ayaa toogtay ina Adeerkii LAAMBAD, isla fiidkiina CAWIL ayaa lagu tuhmaya inuu

dillay ina Adeerkii WAARE. Xeerka reerka u yaal marnaba ma dhiggeyn in haddii MOOGE loo gacan-gelliyey reerka LAAMBAD oo inankoodu uu ka dillay, iyaguna ay cid kale ugaarsadaan oo ay damcaan inay dillaan. Xaalku wuu kasii darray. Laba dhinac ayaa la isku qeybiyey, qeyb CAWIL baaddi-goobta oo soo qabata iyo qeyb MOOGE dib usoo furrata, madaama ay xeerkii jabiyeen reerka uu ka dhashay marxuum LAAMBAD.

SAMATAR, isaga neefsashada ku adag oo xannuunki wadnaha oo uusan si buuxda uga bogsan ayuu darreemaya inuu kusoo kacay, haddana wuxuu isku howlaya hubbinta badqabka Hooyadi oo marki dambe loo xaqiijiyey inay Boqolkiiba-Boqol caafimad qabto. 22 sanno kadibna ay maanta dhex fadhido ardaagi ay ku dhashay SAMATAR, COLAAD iyo XASAN oo la dillay. COLAAD way ku adag tahay Labadii qeyb ee reer GAAFANE isku qeybiyeen inuu mid raaco, oo CAWILna ma baaddi-goobbi karo, MOOGEna masoo furrran karo, walaalkii SAMATAR ayaa gurmad caafimaad uga baahan.

Isaga oo keliya ayaa SAMATAR ku harray oo wuxuu la sugaya inuu aroorta hore u qaaddo Tuullada FARAS oo ah mid deeggaanka masaafo fog u jirta balse gaarri laga heli karo, si uu halkaas gaarri uga sii qaato una gaarsiiyo belledka, si loogu dabiibbo xaaladdiisa caafimaad. SAMATAR dhawaca haya waxaa uga darran xannuunka wadnaha oo kusii kordhaya, wuxuu COLAAD fahamsiiyey xaaladdiisa oo wuxuu u tilmaamay daawooyinkii uu belledka kala yimmid inuu u doono. COLAAD mar dambe inuu ka ag dhaqaaqo way ku adag tahay oo cabsi xooggan ayuu ka qaba in la dillo walaalki oo shaki badan ayaa ka dhex abuurmay reer GAAFANE gudahooda. Haddana danta farraysa inuu usoo qaado daawooyinka uu dalbaday.

COLAAD oo shaki xooggan qaba, ayaa ka dhaqaaqay SAMATAR oo u doonay daawooyinkii, waxaa so dhow qorrax soo bixi oo wuxuu COLAAD sugaya iftiin yar oo bilow ah oo dhulka kusoo dhaca. Wuxuu ku noqday gaarrigi xamuulka ahaa uu SAMATAR la socday ee looga soo taggay fadhigi SALAAL. Nasiib darro gaarriba ma

taagna goobta, dhinac walba ayuu ka eeggay, wuuna waayay aqaladii yarraa ee ka ag dhawaa ayuu su'aallay "Gaarrigi LAAMBAD ee halkan taagna, yaa kaxaystay?". Waxaa lagu war-geliyey in fiidkii hore laga watay goobta oo uu qaatay CAWIL iyo rag kale oo hubeysan oo la socday. Gaarriga waxaaba ku baxsaday CAWIL iyo asxaabti ay falka isla geysteen kadib markii ay hubsadeen inay WAARE nafta dhaafiyeen oo iyaguna aysan nabad helli doonin.

COLAAD oo ka niyad jabsan arrinkii ayaa kasoo dhaqaaqay una soo orday inuu dhaqso soo gaarro ardaagi uu SAMATAR kaga tagay, wuxu u yimmid SAMATAR oo xaaladdiisu si xumaatay, afkana dhiig ka keennay, xannuunki wadnahana wuu kusii siyaaday, dhaawici uu dhabbarka ka qabayna uma uusan hellin wax dabiib ah. Geesta kale ayuu ka arkay in Hooyadi oo iyaduba il darran ay gurmad u fidinayso walaalkii SAMATAR oo darreen soo gallay.

COLAAD oo geerridi WAARE la walaacsana, waxaa uga sii dartay xaaladda uu ku arko walaalkii oo dabbiib iyo dawo

la'aan ah, wuu awooddi waayay inuu sugo qorrax soo baxa wuxuu markiiba xambaarray walaalkii oo uu dhabbarka ku qaadday dhaawiciisi oo sii xumaanayo.

"Midkan badbaadso COLAADOW, Labadaydi wiil way idaayeen" XAAJI MUXUMAD oo ka dul kici la' meydka WAARE ayaa COLAAD u sheeggay inuu badbaadsado Walaalkii SAMATAR. Wax jawaab ah uma celin dusha ayuu saartay Walaalkii, garabkana qorrigiisa ayuu kusii qaatay. Culeyska iyo miisaanka SAMATAR ma darreemayo. Wuxu la dirirraya waqtiga si uu u badbaadiyo Walaalkii. Wuxuu si buuxda u huba in meel aan belledka ahayn inaan SAMATAR lagu dabbiibi karin. Tollow COLAAD, markiisi ugu horreysay ma badbaadin doona qof nool oo waqtiga mala hardami karaa? Wallow uu Jidkii dheerra ee aan lahayn gawaarri wax qaadda iyo geed laga hoos galla kulka cadceedda uu sugayo, SAMATARna uu dhiig bixiisu si darnaanayo.

Saacaddo socod dheer ah kadib, waxaa u jarray masaafo fog isaga oo weli xambaarsan Walaalki, haddana SAMATAR wuxuu weli ku hadaaqaya "Hooyo, Hooyo ..."

oo ay ilmada iyo dhiigga uga qubanayaan, COLAADna wuxuu ugu war-celinaya "Walaalkay SAMATAR, Walaallo" isaga oo neef tuurraya, oo dhididku ka da'ayo, wuxuuna soo dareemaya culeyska miisaanka Walaalkii uu xambaarsan yahay oo wuu socod guurraynaya, tabartii ayaa soo yaraatay, balse ma istaagayo haddana uma dhowa halkuu haminayo. Culeyska uu xambaarsan yahay dartii hal mar ayuu si xun u kufay COLAAD oo waxaa dhinac kale ku dhacay SAMATAR oo markiiba miir dabboolmay. COLAAD ayaa dhabta saartay Walaalkii oo durba bilaabbay inuu kiciyo "SAMATAR, SAMATAR, ila hadal SAMATAR". Tollow SAMATAR maku war-celin doona COLAAD, mise sidii WAARE ayuu naf baxay oo waa geerriyooday ...

## COLAAD | QEYBTA TODDOBAAD

COLAAD ayaa dhabta saartay Walaalki oo wuxuu durba bilaabbay inuu kiciyo oo aan u oggollaan sidii WAARE oo kale inuu dhabtiisa ku waayo "SAMATAR, SAMATAR, ila hadal SAMATAR". SAMATAR oo dhaawac ah, xannuunkii wadnahuna uu kusii labba-jibaarmay ayaa indhaha si dabacsan u soo kala qaadday, si daciifnimo iyo liidasho ku jirtana ku yiri "biyooo …". Wuxuu baaddi-goobbaya dhibco biyo ah oo dhuunta loogu qoyo. Kulleylka jira oo aad u darran iyo deeggaanka oo markiisii horeba ahaa dhul wadda habaas ah, ayaa waxay xaaladda kusii xumeynayaan SAMATAR oo dhaawac iyo xannuun isku biirsadeen.

COLAAD si niyad leh ayuu u farxay markuu arkay in walaalkii ay naftu ku dambeyso oo sidii WAARE uusan ku naf bixin dhabtiisa. Dhiirranaan ayuu ka qaadday oo markiiba wuu booddday, laakin dhinac biyo laga helaya oo loo dhaan taga ma jiro, dad iyo duunyo waxaad miciin-bidda oo ku muuqdana ha sheeggin. Deeggaankii masaafo aad u fog ayay kasoo fogaadeen, Tuuladi ay

rabeen inay gaarraanna uma dhawa, wallow marka la qiimeeyo masaafada-dhulleed ee u horsan ay muujinayso in meel laga noqda aan la jooggin oo Tuulada oo keliya in la gaarra ay dantu ku jirto.

COLAAD waa nin dhul-yaqaan ah oo deeggaanka si fiican u kala garran og', si wacan ayuu uga dharragsan yahay xaaladda abaarreed ee ka jirta deeggaanka, biyo-yar oo aan ku filneyn ayuu jid-mar ahaan u sitay, intii yarreydna markii uu kufay ayuu dhulkii oomana la tagay oo raadba kama harrin. Nasiib darro lagu biirriyey duruufo nololleed oo adag ayaa isku biirsaday COLAAD iyo SAMATAR. Deeggaanka markii horeba waala dayacay oo colaaddo iyo dhiig-daaddin waxaan ahayn laguma aqoon. Beerana laguma tacbado, tiro xoollo naf lehna laguma dhaqdo oo lama manaafacaadsado, deeggaankuna ma caggaarana oo dhir iyo geeddo waaweyn laguma beerran oo lagu hoos gallo kulka jira.

Deeggaanka aan loo turrin, markiisana uma nixin COLAAD oo ay ku cakiran tahay xaaladda, waxayna arrintaasi dhallisay in COLAAD uu si walba uu isku howlo

uu soo waayo hal dhibic oo biyo ah oo uu Walaalkii ku qabboojiyo. Dib ayuu u kacay isaga oo kabo-la', wuxuuna xambaartay Walaalkii. SAMATAR oo dhabbarka lagu xambaarsan yahay, way ku adag tahay inuu xaaladdaas adag sii xamilo oo waxaa yarraaday hiraanhirkiisi iyo dhaq-dhaqaaqi yarraa ee uu wadday. COLAAD, isagana socodka dhib ku ah oo wuxuu isaga oo kabo-la' ku dul lugeynaya, waddo ay buux-dhaafiyeen dhagaxyo yar-yar oo quruurux adag ah, caguhuna aysan mahdinayn ku dul lugeyntooda. Waxaa ugu sii darran qodxaha dhul-yaalka ah ee uu marba mid uu ku istaagayo, inkasta oo uu damqanayo, haddana waxaa uga weyn badbaadinta Walaalkii SAMATAR.

Socod aan kala go' lahayn kadib, Wuxuu Alle ku simay inay soo gaarraan Tuuladi loo han-weyna. Waxaa gurmad ahaan ugu soo kala orday dadkii tuulada jooggay oo u badan reer GAAFANE. Nasiib wanaag, waxaaba Tuulada taaggana Laba gaarri oo rarkoodu u dhan yahay una safraya Belledka. COLAAD markuu indhaha saarray dadkii oo usoo kala ordaya si gurmad loogu fidiyo, rajo ayaa dib

usoo gashay balse cagaha ayuu kusii taagnaan kari waayay, wuxuuna si dabacsan uu dhulka u dhinac dhiggay Walaalkii SAMATAR. "Gaarriga isoo dhaqaajiya" ayuu ka hor-geeyey tiro dad oo ka mid ah intii gurmadka ugu timid ee isla reer GAAFANE ahaa.

Gaarrigi wuu soo dhaqaaqay, waxaana geesta kale lala soo cararay biyo, si afka loogu qabto SAMATAR, COLAAD isaga is adkeyn ayaa ku jirta mooye, naf uu kusii hadla kuma jirto, oday da' ahaan weyn oo dadkii gurmadka isku howlayay so dhex istaaggay, ayaa si aad ah SAMATAR ugu daymooday, intuu COLAADna eeggay ayuu ku yirri "War Marxuum ayaad dhabbarka ku sidatay ee wiilkan ma noolla, halkeed kala timid?" "Waa dhaawac oo waalla daaweyn ee ma dhiman" ayuu COLAAD ku yirri odaygii, wallow uu COLAAD ka cabsi qabo inuu yaqiinsado hadalka uu yirri waayeelkaasi inuu wax un ka jiro, isla tabtii uu WAARE ugu waashay inoo ku kiciyo ayuu ku labba-bilaabbay SAMATAR. Doorkan SAMATAR isagana waa kici-diidday oo waa siduu Odayga tilmaamay, SAMATAR ruuxba kuma jirto oo waana geerriyooday.

Intii ay safarka ku jireen ee uu kufay COLAAD, ayaa SAMATAR ugu dambeysay miir, ruuxda jirkiisa ku jirtana si aayar ah ayay uga baxday oo Alle ayan ku dhibbin nafta oo si qaboobban ayuu ugu geerriyooday dhabbarka Walaalkii ee xambaarsana. COLAAD intuu filayay ma aha arrinkan. Waa markiisi ugu horeysay, waxaana uu u ilmeeyey si aannu ugu ilmeyn geerridi Aabihi CABDIRAXMAAN, Walaalki XASAN iyo ina Adeerkii WAARE. Waayeelkii iyo dhallinti goobta taagneyd ayaa ka dul kiciyey marxuumka uu sida xooggan ugu dhaggana. Weli wuu diiddan yahay inuu aqbalo geerrida Walaalkii balse wadku markuu yimaad doonis iyo diidmo cidna looguma idan qaato.

Mid ka mid ah gawaarridi goobta taagnayd oo rarka laga dajiyey ayaa lagu soo qaadday meydka SAMATAR oo ay wehliyaan dhowr rag oo Tuulada laga soo raaciyey. COLAAD indhihiisa ilmada ayaa weli ka qubanaysa. Xaq ayuu u leeyahay oo weligiiba ma ilmeyn intuu dunidan ibtilada badan jooggay. Deeggaankana tacsi kale taal oo WAARE ayaa weli meydkiisu yaalla ardaaga XAAJI

MUXUMAD. Geesta kale waxaa laso qabtay oo gacanta lagu soo dhiggay ninkii CAWIL ahaa ee dilka u geystay WAARE iyo SAMATAR. Gaarrigi ka yimid Tuulada ayaa isagana hor-dhigtay ardaagi lagu wadda sugna ee tacsidu taal. Dhinac kalena uu ku xirrna oo lagu xabbisay CAWIL iyo Seddex kale oo uu duufsaday oo falka gurracan la geystay.

"COLAAD, ayaa nala jirra iyo Walaalkii oo meyd ah ayaan wadna" ayuu yirri mid ka mid ah raggii COLAAD laga soo raaciyey Tuulada. Reer GAAFANE musiibo tan ka weyn weligood lama aysan kowsan, marka laga yimaad dilkii arxan darrada ahaa ee loo geystay COLAAD Aabihii iyo Walaalki. LAAMBAD, WAARE iyo SAMATAR ayaa hal maalin gudahood la wadda dillay, waa dhacdo kale oo ugub ku ah reer GAAFANE. Meydkii SAMATAR ayaa lasoo dhiggay ardaagi. XAAJI MUXUMAD oo isagu oohin iyo baroor dhammeystay ayaa arkay COLAAD oo gabi-ahaanba ka duwan sidii lagu yaqiinnay. Oday MUUSE ayaa damcay inuu COLAAD u sheeggo war kale oo dhiillo leh

oo ka dambeeyey mudadii uu maqna, XAAJIGA oo ka diidday ayaa dalbaday inuu isagu warkaasi sheeggo.

XAAJI MUXUMAD, ayaa COLAAD garabka qabsaday oo ku yirri "Musiibo uma aan arki jirin haddii geerri ay dhacdo, hal maalin gudahood waxaan ku waayay wiilkaygi WAARE oo garabkayga midig ahaa, waxaan sidoo kale waayay garabkaygi bidix MOOGE oo isna layga dillay". MOOGE habeenkii tagay ee xalay ahayd markii lagu wareejiyey reerka LAAMBAD, lama aysan sugin inay subaxa ka go'aan gaarraan oo durba isla habeenkii ayay halkaas ku dilleen oo ay ku ciil baxeen, iyada oo aysan ogayn in wiilkoodi CAWIL uu dagaal tagay isla xilligaasina uu dil u geystay WAARE iyo SAMATAR.

COLAAD, si loo tilmaamo xaaladdu u ku sugan yahay ma jirto, isaga oo aan wax fal-celin ah sameyn, ayuu XAAJI MUXUMAD warkiisa sii watay, iyada oo Reer GAAFANE oo idil ay maqlayaan ayuu yirri "Anigu waxaan ka dhashay reer GAAFANE laakiin sida la imooday ma ihi, Waxaan hortiina ka qiraya maanta, dhacdo fool-xun oo aan la noolla in ka badan 22-Sanno balse aan u haystay inaan

guul soo hoyay, waxaan xannuunka geerrida darreemay kolkii aan waayay labadaydi wiil ee WAARE iyo MOOGE" isaga oo warkiisa si wata ayuu COLAAD kusoo dhawaaday, sidii nin raba inuu warkan si buuxda ah u dhuuxo, wuxuuna yirri "LAAMBAD, WAARE, MOOGE iyo SAMATAR, waxaa dillay wiilal reer GAAFANE ah oo ay walaallo yihiin. Sidaas si la mid ah walaalkay CABDIRAXMAAN aniga ayaa gacantayda ku gowracay oo dillay, reer MAAX ma aysan dillin (Wuxuu ula jeedda COLAAD Aabihii inuu isaga dillay) Curadkiisana aniga ku hor gowracay Aabihii" ayuu XAAJI MUXUMAD warka ku xirray.

22-Sanno ka hor ayay ahayd marka ceelka weyn ee reer GAAFANE lasoo dhiggay meydadka COLAAD Aabihii CABDIRAXMAAN iyo Walaalkii XASAN oo si arxan darro ah loo gowracay, xubnaha jirkoodana la jarjaray si aan loo aqoonsan, lana soo dul dhiggay ceelka ay reer GAAFANE ka biyo cabbi jireen. Waxaana dhacdadaas ugubka ah ka xannuun badan inuu falkaasi wuxuushnimada leh uu geystay COLAAD Adeerkii XAAJI MUXUMAD oo qirtay 22-

Sanno kadib, markii ay caruurtiisa ku hor geerriyoodeen hal maalin gudahii. Marxuum CABDIRAXMAAN, wuxuu ahaa qof nabadoon ah oo nabad jecel kuna howlan qaboojinta colaaddaha deeggaanka ka taaggan iyo mideynta labada reer ee walaallaha ah, XAAJI MUXUMAD oo si aad ah uga soo horjeedday Walaalkii ayaa ku kacay ficilkaas shirqoolka iyo dilka isugu jira, dushana ka saarray reer MAAX oo aan dambigaasi gaysan, si dabka colaaddeed aannay abid u dammin.

Intii goobta ku sugneyd, qof aan yaab iyo anfariir la taagneyn ma jiro, marka laga reebo COLAAD oo dab holcaya gudihiisa ka shidmay. Ma Adeerkii soo korsaday, ee Magaca COLAAD ula baxay, kana jecla Ubadkiisa, xooggiisa iyo maalkiisa u hibeeyey, ayaa Aabahii iyo Walaalkii dillay oo gowracay? COLAAD wuxuu ku barbaaray in reer MAAX ay Aabihi iyo Walaalkii dilleen. Maanta oo reer GAAFANE tacsi u taal, waxaa soo if-baxay xaqiiqada iyo runta oo kasoo dhex dillaacay XAAJI MUXUMAD. Waa COLAAD oo meydadka SAMATAR, WAARE iyo MOOGE uu hor-yaal iyo Adeerkii XAAJI

MUXUMAD oo qirtay dilka COLAAD Aabihii iyo Walaalkii. Fal-celin tii kasii duwan ayuu COLAAD durba ku kacay, "Qorriga ii dhiib" ayuu COLAAD ku yirri mid ka mid ah raggii kasoo raacay Tuulada, inta uu ammaanka qorriga furtay ayuu reer GAAFANE hortooda madaxa ka saarray qorriga Adeerkii si uu ugu hor toogto ...

**COLAAD | QEYBTA SIDDEEDAAD**

"Qorriga ii dhiib" ayuu COLAAD ku yirri mid ka mid ah raggii kasoo raacay Tuulada, inta uu ammaanka qorriga furtay ayuu reer GAAFANE hortooda madaxa ka saarray Adeerkii si uu ugu hor toogto, wuxuuna ku yirri "Falka aad geysatay 22-Sanno ka hor ee aad ku dishay Aabahay CABDIRAXMAAN iyo Walaalkay XASAN oo aan wax dambi ah lahayn, fal-celinteeda maanta ayay ku haysata, waxaana kugu hor geerriyooday Labadaadi Wiil oo Walaalladay ahaa".

COLAAD oo darreen hadlaya, qorrigana madaxa kaga haya Adeerkii, ayaa hadalkiisa sii watay, iyada oo reer GAAFANE ay la wadda fiigsan yihiin, qiraalkii uu XAAJI MUXUMAD hortooda ka sheeggay. "Dilka aad Aabahay iyo Walaalkay u geysatay, waxaa iga xannuun badan, Dhacdooyinkii runta ka foggaa ee aad igu soo barbaarisay, waxaan ka damqanaya inaad iga indha-tirtay ujeeddada loo noollaado, waxaad cadow iga dhigtay tol iyo reer aan wax fal-dambiyeed ah ii geysan, waxaad igu barbaarisay naceyb iyo cadaawad aan xad lahayn, waxaad iga qarrisay

naxriista iyo rabitaanka darreenka Hooyanimo, waxaad iga tirtay awooddii aan ku darreemi lahaa dhawaqa iyo xannuunka Hooyaday haystay oo miir la' ".

COLAAD ayaa qorrigii uu madaxa kaga hayay Adeerkii ka qaadday, isaga oo garnaqsanaya ayuu warkiisa kusoo xirray su'aallo aad u darreen taabtay intii goobta ku sugneyd oo wadda reer GAAFANE ahaa. Intuu indhaha u qeybiyey tolkiisi oo uu mid-mid u fiiriyey ayuu sida ay u dhan yihiin weydiiyey "Ninkan (wuxuu ula jeedda Adeerkii XAAJI MUXUMAD intuu farta ku fiiqay, isaga oo ciil buuxa) miyaan ka mudna, inuu Aabahay iyo Walaalkay gowraco?, miyaan ka mudna inuu Hooyaday igu hor xabbiso, iyadoo xannuunsan oo uu iga indha-tirro darreenkii Waalidnimo?, miyaan ka mudna Adeerkay xumaha inta la'eg ee uu igula kacay?'. Waa nin rag ah oo xaalad adag ku dhex garnaqsaday Tolkii balse cid u war-celisa oo ku dhiirrata inay u jawaabto ayuu waayay, wallow ay la wadda darreen noqdeen, haddana xaalku wuxuu marraya, Afka juuqda gabbay.

COLAAD, ma sugayo inuu Adeerkii iyo Tolkiiba ka helo war-celin uu ku laab-qabowsado. Intuu Adeerkii soo eeggay, ayuu ku yirrii "Magacaygu Waa COLAAD, waxaan ka dhashay Reer GAAFANE, waxaan hortiina ka qirraya inaan cafiyey oo aan dar Alle ku daayay ninkii Aabahay iyo Walaalkay gowracay, waxaan hortiina ku qirraya inaan dar Alle ku cafiyey CAWIL oo gar-darro ku dillay Walaalladay WAARE iyo SAMATAR, waxaan hortiina ku qirraya inaan cafiyey oo dar Alle aan ku daayey Reerka LAAMBAD oo kaddis ku dillay ina Adeerkay MOOGE, waxaana shardi iyo axdi adag dul dhiggaya reer GAAFANE oo idil". COLAAD, dhacdo aan laga fileyn ayuu goobta la yimmid, cafis ayuu dul dhiggay Adeerkii iyo CAWIL oo goobta ku sugna, iyada oo taas beddelkeeda laga filayay inuu dilli doono Labadoodaba, looguna gar-naqi lahaa hadduu sidaa yeello.

Shardigii uu dhex dhiggay reerkiisa, waa la wadda aqballay oo waa mid la mahdiyey, wuxuuna u dhigna in cid dambe oo reer GAAFANE aysan isku hub arruursan, wiil dambe oo reer GAAFANE ahna aan lagu hor dillin mid

kale oo reer GAAFANE, balse axdi kale oo adag ayaa raacsana oo reer GAAFANE ay si fudud ugu dhiirran karri waayeen inay u aqballaan. Axdigaasi wuxuu u dhigna in reer MAAX lala gogol-fariisto, si colaadda ka dhaxeysa Labada reer loo soo afjaro, halkii uu Aabihii CABDIRAXMAAN kaga dhintay gartii uu waddayna uu COLAAD kasii amba-qaaddo 22-Sanno kadib, garta uu gooyana ay ku qasban yihiin inay qaataan reer GAAFANE oo idil shuruud la'aan. Deeggaan, tuulo ilaa iyo belled goob walba oo ay ku nool yihiin.

Dhiig in ku filan iyo ka badanba deeggaanka si xaq-darro ah waa loogu soo daaddiyey, gabdho badan oo xaasas ah asaay ayaa loo saarray, carruur yar-yarna ifka ayaa looga qariyey, hal-door badana, si arxan aan lahayn ayaa loo xasuuqay. Labada reer fal aysan isku geysan ma jirto, taas waxaaba kasii darran in isla reer GAAFANE dhexdii ay ka bilaabBatay inay geerrido wehel ka dhigtaan oo midba midka kale uu dhiiggiisu daaddiyo, COLAAD wuxuu Alle ku simay inuu noqdo midkii soo afjari lahaa colaadda ba'an ee ka dhexaysay reer GAAFANE iyo reer MAAX, halkii uu

ka noqon lahaa mid colaadda si hurriya, Inkastoo laga filayey inuu noqon doona qof sii holciya colaadda oo aan marnaba joojin doonin.

Tacsidi marki laga kacay kadib oo la wadda xabbaallay wiilashi reer GAAFANE, COLAAD, wuxuu si rasmi ah u fidiyey gogol ay isugu wadda yimmaadeen reer MAAX iyo reer GAAFANE. Alle ayaa sababta mar walba leh oo COLAAD ayuu sabab uga dhiggay in gogoshii ugu horeysay ee Labada reer lagu soo kala kaco, iyada oo nabad iyo heshiis la yahay. Hankii COLAAD-Aabihii uu lahaa waa rumoobay 22-Sanno Kadib oo colkii aya isku beddellay nabad iyo wadda noolaanshiyo.

Waa Subax kale oo Sabti ah, waana 42-Sannadood kadib maalintii la gallay axdigi heshiiska nabbaddeed ee Labada reer u dhaxeeyey, ma jiro col iyo daggaallo isxig-xiga oo dhacay muddadaasi, ma jiro dhiig daaddanaya oo lagu naf baxay, waxaa si buuxda u hirgellay oo lagu wadda nool yahay axdigi la isla qaatay. Waa deeggaankii uu ku dhashay COLAAD oo aan xad-beenneed lahayn, doorkan isdhex-gal bulsho iyo kobac nololleed ayaa deeggaanka ka

muuqdo. Marka aad taagan tahay afaafka hore ee laga soo gallo deeggaanka oo aad eegto dhinaca waqooyiga kaga beeggan deeggaanka, waxaa ku muuqanaya dhul-beerreed aad u weyn oo lagu beerray badar laga quuto deeggaanka, loona iib-geeyo deeggaannada kale ee ku teedsan. Xoollaha lagu dhaqdo deeggaanka waa tiro-beel oo ceelasha biyaha ayaa ku badan.

Waxaa markii ugu horeysay deeggaanka ay ka furran yihiin goobbo waxbarasho oo isugu jira madarasado lagu barto Qur'aanka Kariimka oo ubadka lagu barbaariyo iyo dugsi weyn oo loogu magac-darray dugsiga hoose, dhexe, sarre ee SAMATAR CABDIRAXMAAN. Waxaana kasoo qallin-beddeshay in ka badan 23aad Dufcadood oo u gudbay heerka waxbarashada sarre oo aqoontii ay soo barteen deeggaanka kusoo labba-celiyey manfaciisi. Goobaha caafimaad ayaa si weyn loogu horumariyey deeggaanka oo baahi caafimaad oo belled loo taga way yar tahay.

COLAAD, xilligan da'diisu waa oday 64 jir ah, deeggaanka aan dhinac uga bixin, waana hal-beeggii ka dambeeyey

inuu hirgello, isbeddelka weyn ee deeggaanka ka muuqdo dhinaca wax-soo-saarka, waxbarashada, nabadgelyada iyo wadda noollaanshaha. COLAAD, wuu guursaday oo wuxuu Eebbe ku arsaaqay 4 Carruur, oo uu ugu magac-darray MOOGE, WAARE, SAMATAR iyo FAADUMO. Ubadkiisu waa dad aqoon sarre leh oo dadka iyo deeggaanka ugu shaqeeya xirfaddaha iyo aqoonta ay la soo bar-baareen oo ay fursadda u helleen. COLAAD, Hooyadii FAADUMO, 10-Sanno ka hor ayuu Eebbe oofsaday oo way geerriyootay, wuxuuna ku dhinac aasay qabrigi Aabihi CABDIRAXMAAN iyo Walaalladii XASAN iyo SAMATAR. XAAJI MUXUMAD, isagu cafiskii uu COLAAD u fidiyey ma uusan calfan oo sannad kadib ayuu dar-xumo u dhintay, isaga oo nolosha ku silcay, sakaraadkuna u xannuunjiyey.

COLAAD, sida caaddada u ah Salaadda subax marka uu ooggo, wuxuu booqda qabriga qoyskiisa oo uu halkaas ugu soo duceeyo. COLAAD Alle wuxuu sidoo kale ku simay inuu noqdo Awoowe dhex fadhiya 16 Carruur oo ay ubadkiisu dhalleen. Mid ka mid ah carruurta uu

Awoowaha u yahay oo la yiraah MAXAMED-YARRE oo ay saaxiibbo dhow yihiin, ayaa qolka ugu yimid kuna yirri "Awoowe, weli ma diyaar garroobin miyaa? ballantu sidan miyay ahayd?!". Deeggaanka maanta, waa maalin ku weyn oo waxaa laga furri raba Jaamacad ballaaran oo ardayda deeggaanka ay ku wax-barran doonaan. COLAAD waa sumada nabadda ee deeggaanka, waana marti-sharaf si qaas ah ugu cassuuman munaasibadda xarig-jarka Jaamacadda cusub oo si isxil-qaan leh ay u dhisteen dadka deeggaanka. Arrinta kale ee mudnaanta sii leh ayaa waxay tahay, in munaasibadda uu kasoo qeyb-galli doono Madaxweynaha Dalka oo markiisi ugu horeyey soo booqanaya deeggaankan gaarray heerka isku filnaanshaha si uu dhiirra-gellin iyo taaggeero ugu muujiyo.

MAXAMED-YARRE, wuxuu labbiska ka saxaya Awoowgii COLAAD oo aan ku qanacsaneyn inuu xaflad iyo arrimo la xiriira uu goob-joog ka ahaado, oo wuxuu jillaya waayeelnimada cirada leh, wuxuuna leeyahay "MAXAMED-YARROW, mad i daysid Awoowe, Oday ban

ahay, ma xamilli karee!". Cid ka yeellaysa warkaasi ma jirto oo dadkii deeggaanka ayaa hor-tuban gurrigiisa oo wadda sugaya, ugu dambeyn isaga oo cagga-jiiddaya ayaa la kaxeeyey Oday COLAAD. Madaxweynaha Qaranka iyo wefdigiisi ballaaranna ayaa soo gaarray goobta loo asteeyey inay ka qabsoonto munaasibadda qiimaha leh. Deeggaanka waa lagu wadda dhan yahay madaxdii ugu sarreysay dalka, hal-doorkii deeggaanka iyo ardaydii ayaa goobta wadda camirray.

Daqiiqadahii ugu dambeeyey ee xafladda ayaa la marraya, waxaa kalmad sharafeed soo jeeddinaya Madaxweynaha Qaranka oo munaasibaddana soo xirraya, isaga oo si aad ah ugu nuux-nuuxsaday in isbeddelkana ballaaran uu sababteedu leeyahay COLAAD oo axdi adag oo aan la jabbin karin ku dhisay nabaddan. Madaxweynaha iyo wefdigiisa waxay fagaarraha hortooda ugu yeerreen Oday COLAAD oo lagu abaal-marriyey billad sharafeed heerkeedu sarreeyo oo loogu magac-darray, **Hal-beegga Nabbada ee Qaranka**. Madaxweynaha, ayaa biladda qoorta u surray Oday

COLAAD oo fooraarku yarra dhibbayo balse sidiisi isku adkeyn og'.

COLAAD, isjooxaaris ma hurrayo, intuu biladii eeggay, ayuu Madaxweynihiisi ku yirri "Madaxweyne, anigu waxaanba u haystay in darajada Madaxweyne la igu maamusi doono, ma bilad keliya la ii gartay?!" Ayuu qosol yar oo qafiif ah sii raacsaday. Madaxweynihii Qaranka, ayaa geestiisa ka dhoolla-caddeeyey, intuu garabka qabsaday ayuu ku yirri, "Adigu Hal-beeggi Nabadda ayaad tahay, oo Macallinkii nabadda ay ka barranayeen barbaarta iyo Madaxda dalka ayaad inoo tahay, ee Macallinow, madarasadda nabadda, ha inagu soo cidleyn". COLAAD intuu kolkiisana dhoolla-caddeeyey ayuu yirri "Alle nabadda ha inoo siyaadiyo”.

Sacab, mashxaraddeyn iyo maamuusid ayaa lagu soo xirray munaasibaddii oo Oday COLAAD ayaa si heer sarre loogu maamusay kaalintii uu ka qaatay nabaddeynta iyo horumarinta deeggaanka. 42-Sanno ka hor deeggaanku xaalkiisu wuxuu ahaa qalleyl dhiig lagu qoyay, haddase waa qoyaan nabad lagu qoyay! Waxaa la harsanaya

neecowda nabadda, waxaana la gurranaya mirahii ay raggii colaadda diiddeen hore ugu beerreen deeggaanka.

Immisa qof oo COLAAD oo kale ayaynu u baahanahay si aan colaadda dhexdeena usoo afjarno? ...

**DHAMMAAD**

# GUNAANAD

**"Colaad"** waxay u taagan tahay fariin wacyigelin ah oo ku saabsan dhibbaatada colaaddaha iyo saameynta ay ku reebbaan bulshooyinka. Inkasta oo ay colaaddaha yihiin xaqiiqo xanuun badan oo saameeyey dad badan iyo deegaanno, haddana waa muhiim in aan si joogto ah uga shaqeyno sidii aan u damin lahayn dhibbaatadaas. Qisadan, oo aan ku soo bandhignay dhacdooyin ka tarjumaya nolosha iyo saameynta colaaddaha.

Waxaan ku faraxsanahay inaad akhriday Qisadan, waxaana rajeynayaa inay ku xasuusiso muhiimadda ah in aan u midoowno sidii aan u heli lahayn bulshooyin nabdoon oo isku xiran. Nabadda iyo isfahamka waa furaha horumarka iyo xasilloonida. Waa inaad dareentaa in qisadan aysan ku salleysanayn cid gaar ah ama koox gaar ah, balse ay ku taagan tahay baaq nabaddeed oo guud ahaan bulshada ka faa’iideysan karto.